



## KA HORTAGGA LACAGTA LA DHAQAY

*Tusmabixiye Adeegyada Shaqada Ganacsiga Lacageed*

Nidaamyada Lagaga Hortagayo Falalka  
Dembiyeed ee  
La Xiriira Maaliyadda  
Wasaradda Hantidhowrka Mareykanka  
Washington, DC



**Waxaa lagayaaba shaqadaada ganacsi  
inay tahay adeegyada shaqo ganacsi  
lacageed haddii...**

Shaqada ganacsi waxay fursad ku siin mid ama wax ka badan adeegyada soo socda:

- ♦ Jeega wareega
- ♦ Jeega socotada
- ♦ Jeega lacagta caddaanka
- ♦ Macaamil lacag ama isku beddelid lacag
- ♦ Qiimaha Kaydsan

-IYO-

Shaqo ganacsi:

- ♦ Fulin in kabadan \$1,000 doolar adeegyo shaqo ganacsi lacageed isla hal qof (hal nooc oo howlfulin ah) isla maalin gudaheed.

-AMA-

Shaqo ganacsi:

- ♦ Siinayo adeegyo xawilaad lacag tira kasta.

## Jadwal Tusmo Kooban

Horudhac

Asalka Lacagta La Dhaqay

Xeerarka Waxqaqabdarka Layska Rabo Sirqarinta Bangiga (BSA)

[Xeerar Kooban Qaarkood oo la Xiriira Waxkaqabada Layska Rabo Sirqarinta Bangiga](#)  
[Diiwaangelinta Loo Baahan Yahay](#)  
[Tilmaanbixinta Fayl-gareynta](#)  
[Liiska Wakiilada](#)  
[Dokumentooyinka Taageerayo](#)  
[Ciqaabta Madaniga iyo Tan Dambiiilaha](#)  
[Adeegyadda Sameeya Shaqada Ganacsi Lacageed \(MSBs\)](#)  
[Way Saacidi Karaan Ladagaalanka Lacagta La Dhaqay. Sameeynta Barnaamijka u Hoggaansanaanta Dhabargoynta Lacagta la Dhaqay.](#)  
[Sugidda Xiriirka Qofka Macaamilka](#)  
[Fayl-gareyn Warbixinnda Falalka Shakiga Dhalinaya](#)  
[Waa Maxay "Falal Shaki Ku Jiro"](#)  
[Calanka Gaduudan](#)  
[Maxay Adeegyada \(MSBs\) raadinayaan?](#)  
[Adeegyada \(MSBs\) Siyaabo Kale Ayeey Wax u Saacidi Karaan](#)  
[Fayl-gareeynta Warbixinta Ganacsi Lacageed \(CTR\)](#)  
[In La Hayo Diiwaangelinta](#)  
[Warbixinnda oo Saacidayo Adeegyadda \(MSBs\) Inay Aqoonsadaan Macaamilada Ganacsi Lacageed ee Shakiga Ku Jiro.](#)  
[Lacag Caddaan oo soo xarootay iyo Lacag Caddaan oo baxday ee Macaamil Ganacsi Lacag ee](#)  
[Baaxad Weyn.](#)  
[Warbixinno Wax Gaar Ah Loogu Talagalay](#)  
[Warbixinnda Lacagta Xawilaadda](#)  
[Alaab \\$3.000 doolar "Diiwaan"](#)  
[Safeeynta Xusuusyada /Rasiidyada](#)  
[Qoraalka Diiwaangelinta Xawaaladda ee \\$3.000 doolar.](#)  
[Warbixinnda Falalka Qofka Macaamilka](#)  
[Nidaamyo Iskudubbaridan Qaarkood](#)  
[Sharci Dejin](#)  
[Dadaalka Caalamiga ah ee Lacagta La Dhaqay](#)  
[Waddamada Talawadaaga iyo Dhaqaale iyo Liisaska Cunaqbateynka Ganacsiga](#)  
[Qaamuus](#)

## Horudhac

Lacagta waxaa loo dhaqayaa in lagu qariyo falal aan sharci ahayn, ay ku jirto falal dambiyeed oo isla lacagtaasi ka timid sida beec mushtarka doroogada.

Lacagta la dhaqay waxaa lagu qariyaa ilaha aan sharciga ahayn oo ay ka timid si loo isticmaalo ayadoon la ogaanin raadka faldambiyeedka ay ka timid.

Hay'adaha Maaliyadeed - taasoo ku jirto xiriirada ballaaran ee adeegyada shaqada ganacsi lacageed (MSBs) waxay qabaan labadaba ka qaybgalayaan wax fahmi karo ama wax fahmi karin falalka lacagta la dhaqay. Bangiyada waxay ahaayeen bartirmaamyada ugu badan ee howlfulinta dhaqidda lacagta , maxaa yeelay waxay bixiyaan adeegyo iyo alaab lacageed ee ku jirto jeegaga damaanada (cashier's checks) , jeega socotada iyo hab gudbin lacageed (wire transfer) oo loo isticmaali karo in lagu qariyo ilaha ay ka yimaadeen oo aan sharci aan ahayn. Sidoo kale, dambiliyaaasha waxay isticmaalaayaan Adeegyada (MSBs) - oo ah adeegyo bixinayo jeega wareeg, jeega socotada, xawilaadaha lacagta, jeeg damaanad, isku beddelaada lacagaha, iyo qiimaha kaydsan - si ay u qariyan asalka ay ka timid hantida.

Si ay isu difaacaan, una taageeraan waddanka gudihiisa iyo dadaalka adduunweynaha xagga ka hortagga Dambiyada la xiriira maaliyadda, waxaa muhiim ah in Adeegyada (MSBs) ogyihiin nidaamyoada ay u shaqeyneyso dhaqitaanka lacagta.

Tilmaantani waxay bixinaysaa aasaas macluumaad oo ku saabsan sharciyada lacagta la dhaqay, waxaa lagaga hadlayaa tillaaboyinka caalamku ka qaaday,waxayna muujin nidaamyo badan oo la xiriira hay'adaha maaliyadda , waxayna bixin tusaale digniino qayaxan oo laga yaaba iney waxtarto Adeegyada Sameeya Macaamilada Lacagaha- inay iska difaacaan lacagaha la dhaqay iyo dambiiyleyal kale.

## Asalka Lacagta La Dhaqay

Dhaqitaanka Lacagta waxay noqon kartaa dhown howlfulino oo isku jiraan. Waxay qusaysaa saddex maraxaladood oo mararka qaarkood isu dhameystiraya.

Meelaynta waxay ku lug leedahay in si muuqaal ahaan lacag sharci darro lagu helay lagu meeleyeyo qaab maaliyadeed. Lacagta waa midda ugu sahlan in la ogaado iyo in la qabto marka la meeleynayo.

Dhigista (Kala dhig-dhigiida) waxay quseysaa kala saaridda lacagta sharci darrada ka timid iyo faldambiyeedka ay ka timid ayadoo la soo marsiiyey si taxan macaamil maaliyed oo ka dhigeyso arrin aad u adag si loo raad raaco meesheey ka timid asalkeeda.

Isku darrida waxay quseysaa in hawsha loo wado si u eg hab sharci ah. Iskudarridda waxaa ku jiri kartaa iibsasho gaari, shaqo ganacsi iyo guri la gato, iwm. Waxyabaha muhiimka ah oo isku xirayo saddexda marxaladood ee habka howsha u socoto waa "warqadaha raad-raaca ah "oo ka soo abuurantay macaamilka maaliyadeed.

Hal siyaabood ay dambiileyaasha lacagta dhaqo ay iska ilaaliyaan warbixinta iyo diiwaangelinta waa habdhismo macaamilo ganacsi lacag, jujuubid ama in shaqaalaha oo la laaluusho inaysan fayl-gareynin warbixinada layska rabo ama in la buuxiyo sharuudaha xusuus dhowrka ama in la sameeyo shaqo ganacsi u muuqata sharci sida loo furan lahaa xisaab ama loo sameeyo xiriir macaamil ganacsi ah.

Sanadahan dhow, wadamo badan waxay fuliyen sharciyo lagula dagaallamayo lacag dhaqidda. Dadka nidaamiyo Adeegyada Maaliyadda iyo haya'adaha xoojinta adduunka ku fidsan waxay ku howlan yihin siday ku hormarin lahaayeen isgaarsiinta iyo inay isdhaafsadaan macluumaadka Dhabargoyinta lacagta la dhaqay.

Buugaani, waxaad ka heli doontaa arrimo kooban ee la xiriira dhaqdhaqaqa caalamiga sida dowladda.

Mareykanka ay u xoojisay la dagaallanka lacagta la dhaqay.

Waxaad kaloo ka heli kartaa habab oo ku saacidayo sidaad ula dagaalami lahayd lacagta la dhaqay adoo ka dhigaya mujitmacaaga- iyo waddaankaaga -meel nabadgalyo ka jirto lagu noolan kara, laguna shaqeyn kara.

## Xeerarka Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bankiga (BSA)

Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Falalka Dambiyeed ee la Xiriira Maaliyadda (FinCEN), waa qaybta Hantidhowrka Dowlaadda Mareykanka waxay maamushaa ayna soo saartaa xeerar ku dabakhan Waxkaqabashada Layskarabo ee Sirqarinta Bankiga (BSA). Iyadoo la isticmaalayo BSA warbixiintooda iyo xusuus hayntooda, waxaaa la sameeyey "warqado raad-raac" ee la xiriira macaamil ganacsi ay dadka fulinaya sharciga iyo kuwo kale ay u isticmaali karaan baarista dambiyada, canshuuraadka iyo nidaaminta.

Warbixinada iyo diiwaangelinta oo la siinayo BSA waxaa lagu dabakhi karaa Bangiyada Keydka iyo Deynta (Credit Unions) iyo kuwa ah haya'adaha keydinta (Guud ahaan loo yaqaan "Bangiyo") iyo shaqo ganacsiyo kale loo caddeyay iney yihiin haya'adaha maaliyadda, ay ku jiraan meelaha lagu dheelo qamaarka, dallalo iyo ganacsada ka shaqeeysto caymisyada, iyo adeegyada sameeyo shaqo ganacsi lacageed (Isugeyntooda lagu tilmaamay Inaysan ahayn Bangiyo).

Xeerarka Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta (BSA) waxay rabtaa Adeegyada Shaqada Ganacsi Lacageed (MSBs) inay iska diiwaangeliyaan Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Faldambiyeedka la Xiriira Maaliyadda (FinCEN) inayna haystaan liis wakiilo haddi ay jiraan. Sidoo kale, xeerarka BSA waxay rabaan Adeegyada sameeya Shaqo Ganacsi iney u soo warbixiyaan falal kasta oo laga rabo FinCEN. (Fiiri 103.20)

## Xeerar Kooban oo ku Saabsan Waxkaqabashada Layska Rabo Sirqarinta Bangiga (BSA)

1. Diiwaangelin-shaqo ganacsi waliba oo ku qeexan magaca Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed waa inay iska diiwaan geliyaan , oo aanan ku jirin kuwa soo socda:

- ◆ Shaqo ganacsi oo ah Adeegyo MSB kelia , sababtoo ah wuxuu ku shaqeyaa sida wakiil adeegyo shaqo ganacsi lacageed ee MSB kale;
- ◆ Shaqo ganacsi oo ah Adeegyo MSB kelia oo soo saaro, gado ama dibugato qiiimaha keydsan;
- ◆ Adeegyada Boostada ee Mareykanka iyo hay'adaha Mareykanka ee dawlad kasta, ama dowlad kasta oo siyaasad ahaan u sii hoosqaybsan.
- ◆ Xafiiska laanta adeegyada sameeyo shaqo ganacsi lacageed ma looga bahno inay fayl-gareeyaan

diiwaan gelintooda.

Tixraac [http://www.fincen.gov/financial\\_institutions/msb/](http://www.fincen.gov/financial_institutions/msb/) oo casriyeysan adoo ka helaaya Addeegyada Sameeya Shaqo Ganaci lagaheed marka laga rabo inay is diiwaan gelyaan.

2. Liiska Wakiilada —

- ♦ Adeegyada Sameeya Shaqo Ganaci Lacageed waxaa laga rabaa inay diyaariyaan oo ayna hayaan liiska wakiilooda hadduba jiro, bisha Janaayo kowdeeda kasto ee 12bilooda ee soo socda.
- ♦ Marka la weydiisto, Adeegyada Sameeya Shaqo Ganaci Lacageed waa inay siin karaan Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Faldambiyeedka La Xiriira Maaliyadda (FinCEN) liiska wakilooda iyo kuwo kale oo ku haboon fulinta sharciga ama wakaaladaha kormeerka sameeya (ay ku jirto IRS oo leh awoodda baarista Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA).

3. Warbixinta Falalka Laga Shakiyo (SAR) - Adeegyada Sameeya Shaqo- ganaci lacageed oo laga rabo inay fayl-gareeyaan waa:

- ♦ Adeegyada Sameeya Shaqo Ganaci(MSBs) oo sameeynaya adeegyada gudbinta xawaaladda
- ♦ Ganacsadayaasha lacagaha ama iskubeddelaada lacagaha.
- ♦ Kuwa soo saara, Kuwa iibiy, ama kuwa dibugadanaya jeega wareega.
- ♦ Adeegyada Boostada Mareykanka.

Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Falalka Dambiyeedka ee la xiriira Maaliyadda(FinCEN), waxay ku tala jirtaa inay dib u saxdo Xeerarka Warbixinta la Xiriira Falaka Laga Shakiyo (SAR) si ay dadka sarrifo jeega inay ka warbixiyaan falalka laga shakiyo.

Tixraac [http://www.fincen.gov/financial\\_institutions/msb/](http://www.fincen.gov/financial_institutions/msb/) oo casriyeysan adoo ka helaaya Adeegyada Sameeya Shaqo Ganaci lacageed (MSB) marka laga rabo inay iska diiwaangeliyaan SARs.

Adeegyada sameeya shaqada ganaci lacageed (MSBs) waa inay hayaan dhammaan nuqallada faylasha ay u direen falalka dhalinaya shakiga iyo xitaa asliga iyo diiwaangelinta shaqo ganaci la mid ah iyo wixii dokumenti ah oo taageeraya in muddo 5 sano ee laga soo billaabo taariikhdiil la sameeyay warbixinta. Dokumentayaasha taageeraya waa inay muujiyaan sida ay yihiin iyo walow aan la fayl-gareynin warbixinta dokumentayaasha taageerayo lagu qiyasayo in lagula fayl-gareeyay Warbixinta. Marka la weydiisto adeegyada MSB waa inay diyaar u ahaadaan inay siiyaan dokumentiyaasha taageeraya" Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Falalka Dambiyeed ee la Xiriira Maaliyadda" (FinCEN) iyo kuwo kale oo ku haboon fulinta sharciga ama wakaaladaha kormeerka (ay ku jirto IRS oo leh awoodda baarista Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga).

4. Barnaamijka Ka Hortagidda Lacagta La Dhaqay (AML) - Dhammaan adeegyada MSBs ay ku jiraan kuwa soo saaraya , kuwa gadaya, ama dib ugadanaya qiimaha keydsan waxaa laga rabaa inay horay u mariyan iyo inay fuliyaan Barnaamijka ka Hortagga Lacagta La Dhaqay sida ay rabto Qaybta 352 USA PATRIOT Act iyo fulinta xeerarka 31 CFR 103.125.

5. Warbixinta Macaamilka Lacagta(CTR) -Adeegyada Sameeya Shaqo Ganaci Lacageed (MSBs) waa inay u fayl-gareeyaan Warbixinta Macaamilka Lacagta macaamilkasta oo ku jirta lacag ka badan \$10,000 doolar, ha ahaato lacag caddaan ah oo la qabtay ama la bixiyey oo lagu fulayey ama loo maray Adeegyada Sameeya Shaqo Ganaci Lacageed hal maalin gudaheed qof sameeyay amd qof matalaya isla qofkaasi.

6. Warbixinta Alaabta Qiimo Lacag Leh - Adeegyada (MSBs) waa inay hayaan macluumaadka qaarkood ee iibinta aalaabaha qiimaha lacagta leh - sida jeega wareega ama jeega socotada-laga billaabo \$3,000-\$10,000 doolar iskudarka guud.

7. Qaunuunka Xawilaadda Lacagta-Adeegyada (MSBs) waa inay hayaan macluumaad qaarkood oo ku saabsan xawilaad lacag sida diridda ama qabashada amarbixinta xawilaad lacag oo ah \$3,000 doolar ama ka badan, iyadoon la tixgelin habka lagu bixiyey.

8. Diiwaangelinta Beddelada Lacagta - Adeegyada (MSBs) waa inay hayaan diiwaangelin qaarkood lacag waliba oo la beddolo oo ka badan \$1,000 doolar.

9. Xafidaada Diiwaangelinta - Dhammaan diiwaangelinta Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA) waa in la xafidaa illaa muddo 5 sano, waana in la fayl-gareeyaa ama loo keydiyaa qaab oo haddii loo baahdo la heli karo muddo dhexdeed oo macquul ah.

## Diiwaangelinta Loo Baahan Yahay

Xeerarka Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA) waxay ka rabtaa Adeegyada (MSBs) inay u diiwaangeliyaan Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Faldambiyeedka La xiriira Maaliyadda

(FinCEN) kama dambeysta Disembar 31, 2001. Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed (MSB), oo la aasaasay taariikhdaas kaddib waa inay is- diwaangeliyaan ugu dambeystii dhammaadka muddo 180 maal mood laga soo billaabo kaddib taariikhdiilaa laga asasay. Laanta ama wakiilka keliya ee Adeegyada MSB ma laga doonayo inay fayl-galeeyaa qaabka diiwaangelintooda. Adeegyada Boostada Mareykanka iyo Wakaaladaha Federalka iyo Dawladda lagama doonayo inay is diiwaangeliyaan. Xittaa, adeegyada (MSBs) oo bixinaya qiimha keydsan keliya lagama rabo inay is-diiwaangeliyaan waqtigani.

Adeegyada (MSBs) waxaa laga rabaa inay cusbooneysiyaan diiwaangelintooda laba sano waliba ee Disembar 31 dhammaadka taariikhda laba sanadood, iyagoo tixraacayo diiwaangelintoodii hore. Sidoo kale, Adeegyada MSBs oo laga doonayo inay is diiwaangeliyaan waxaa kaloo laga rabaa inay diyaariyaan oo ayna xafidaan liiska wakiiladaha, haddii ay jiraan, Janaayo 1 ee muddo 12 bilood soo socota.

## Tilmaanbixinta Fayl-gareynta

Adeegyada (MSB) waa inay isku diiwaangeliyaan ayagoo u fayl-gareynayo Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Falalka Dambiyeed ee la xiriira Maaliyadda (FinCEN) Foomka 107, diiwaangelinta Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed oo laga helayo [http://www.fincen.gov/financial\\_institutions/msb/](http://www.fincen.gov/financial_institutions/msb/) ama la waco IRS Qaybta qaybinta Foomamka 1-800-829-3676. Diiwaangelinta waa masu'ulyad saaraan milkiilaha ama qofka ilaalina aadeegyada MSB oo ah qofka saxiixaya oo fayl-gareynaya foomka diiwaangelinta oo dhammeystiran.

## Liiska Wakiilada

Adeega MSB oo laga rabo inuu is-diiwaangeliyo oo qabaan wakiilo waa inay diyaariyaan oo ayna xafidaan liiska wakiiladaasi. Liiskani waa inuu ahaado mid casriyeysan, ugu dambeystii 1da Janaayo ee sannad waliba. Adeega MSB waa inay Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Faldambiyeedka La Xiriira Maaliyadda (FinCEN) ka heli karaan liiska wakiiladooda iyo kuwo kale oo ku habboon fulinta sharciga oo ay ku jirto IRS, marka la weydiisto.

Guud ahaan liiska wakiilada waa inay ku jiraan

- ♦ *Magac:* The name of the agent, including any trade names or doing-business-as names.
- ♦ *Cinwaan:* The address of the agent, including street address, city, state, and ZIP code.
- ♦ *Nooca Adeegyada:* The type of MSB services the agent provides on behalf of the MSB maintaining the list.
- ♦ *Tirada guud ee macaamilka lacagta:* : A listing of the individual months in the 12 months preceding the date of the agent list in which the agent's gross transaction amount, for financial products or services issued by the MSB maintaining the agent list, exceeded \$100,000.
- ♦ *Hayadaha Keydinta:* Name and address of any depository institution at which the agent maintains a transaction account for any of the funds received in or for the MSB services the agent provides on behalf of the MSB maintaining the list.
- ♦ *Sannaadkaad Noqotay Wakil:* The year in which the agent first became an agent of the MSB.
- ♦ *Laamaha:* *Tirada laamaha iyo kuwa hoos imanaya wakiiladaha oo wakiilka hayo liiska hadday jirtaba.*

## Dokumentooyinka Taageerayo

Dokumentiga taageerayo, ku jira nuql diiwaangelinta foomamka la fayl-gareeyey, qeeymeynta cabirka shaqada ganacsi, macluumaad ku taqlusan lahaansho ama kontarool iyo liiska wakiilka waa iney adeegyada MSB xafidaan muddo 5 sannadood.

## Ciqaabta Madaniga iyo Tan Dambiilaha

Ciqaabta Madaniga iyo tan dambiilaha waxaa lagu waajibin karaa inay jibiyeen sharciga iyo xeerkanka dhabargointa lacagaha la dhaqay. Ciqaabta waxay noqon kartaa ganaax adag iyo muddo xarig ah. Adeegyada (MSB) kasta oo ka soo bixi waayo inuu adeeco Waxqabashada Layskarabo Sirqarinta Bankiga (BSA) inuu soo wargeliyo iyo inuu diiwaangeliyo wuxuu la kulmi karaa ciqaab madani oo ah \$500 dolar xadgudabka uu sameeyey iyo tiro ka sii wayn markuu ugu talagalay xadgudabka: tirada lacag ee ku lug leh xawaaladda ay tahay illaa \$100,000 dolar ama \$25,000 dolar. Duruufaha qaarkood, shaqada ganacsi waa loo qaban karaa masuuliyad dambi oo ka timid falal ay sameeyeen shaqaalahaooda. Tan ugu sarreeysa ciqaabta dambi oo lagu sameeyey xadgudab Waxqaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bankiga (BSA) waa illaa iyo 500,000 oo dolar ama la xiro illaa 10 sano ama

labababa. Sidaa darteed waxaa muhiim ah inuu jiro hab lagu xaqijiyo inay shaqaalaha raceen dhammaan sharciyada iyo xeerarka lagu dhabargoynayo lacagta la dhaqay.

Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed (MSBs) waxay sameyen karaan dadaal dheeraad ah ay ku taageeraayeent dawladda Federaalka fulinta dhabargoynta lacagta la dhaqay. Ugu yaraan adeegyada MSB sameeyo shaqo ganacsi lacageed waa inay u faylgareeyaan Warbixinta Waxkaqabadka Sirqarinta Bangiga (BSA) si habsami ah iyo waqtii nidaamsan, inayna curiyaan ayna u hayaan si taxadir ah xusuusaha BSA ee layska rabo muddo duruuri ah dhexdeed, inay suaan ayna haayaan qorsho caddeecid iyo in loo xoggaansanaado dhammaan tilmaamaha qaybta hantidhworka dowladda oo la xiriira Waxkaqabadka Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA)

## Adeegyadda Sameeya Shaqada Ganacsi Lacageed (MSBs)

### Way Saacidi Karaan Ladagaalanka Lacagta La Dhaqay. Sameeynta Barnaamijka u Hoggaansanaanta Dhabargoynta Lacagta la Dhaqay.

Adeegga Sameeya Shaqo Ganacsi Lacag waliba waxaa laga rabaa si sharci ah inuu haysto qorsho aaddecid ee Dhabargoynta Lacagta La Dhaqay (AML). Xeerkarka waxay ka rabaan Adeegyada MSBs inay hormariyan ayna xafidaan Dhabargoynta Lacagta La Dhaqay Qorshaheeda Aaddeecidda oo ku jirta 31 CFR 103.125. Qorsho waliba waa inuu u dhigmo khatarta ku aadan meelaha, cabbirk, nooca iyo baaxadda ay sameeyeen adeegyada shaqo ganacsi lacageed (MSB). Tusaale ahaan, lacag baaxad wayn oo lagu gudbiyey shaqo ganacsi oo wayn oo meel nawaaxiga ee Los Angeles xiga, taasoo khatarteeda sareeyso haddii loo fiiryo jeeg yar oo lacag caddaan ah oo hooseeyo baaxaddisa ee shaqo ganacsi ee meel ku taala Boise. Sidaa darteed tiro wayn oo lacag ah ee laga gudbiyay California waxaa laga rajeynaya inay qabto arrimo aad u dhib badan oo hoggaansanaanta qorshaha Dhabargoynta Lacagta La Dhaqay (AML) haddi loo fiiryo inta u dhiganto surreynta khatarta jeega ugu yar ee laga sarriftay Idaho oo khatartiisu aad u hooseysyo isticmaal ahaan uma fududayn karto lacagta la dhaqay. Qorsho wax tar leh waa kan loogu talagalay inay ka hortagto Adeegyada MSB u fududaynta loo isticmaali karo lacagta la dhaqay.

Barnaamijka U Hoggaansanaanta Dhabargoynta Lacagta La Dhaqay Waliba waa inuu ahaadaa qoraal waana inay lahaato:

- ♦ Ujeedo loo midoobay, habka iyo kontroolka gudaha oo si macqul ah loogu talagalay in la xaqijiyo hoggaansanaanta Waxqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA).
  - ♦ Inay u magacaabaan sarkaal u hoggaansan, masuulna ka ah maalin waliba Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga iyo Hoggaansanaanta Qorshaha.
  - ♦ Siyaan waxbarasho iyo/ama tababar shaqaale ku habboon iyo
  - ♦ In la siiyo muraajaco madax bannaan oo lagu kormeero iyo xafidaad qorsho u qalmo.
- Maamul adag oo loo ballanqaaday Qorshaha Dhabargoynta Lacagta La Dhaqay (AML) waxay gacan ka geysaneysaa hoggaansanaanta socoto, waxayna ka saacidi Adeegyada MSB in loo isticmaalo lacagta la dhaqay.

Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Faldambiyeedka Maaliyadda (FinCEN) waxay dhiirinimo gelinaysa Adeegyada (MSBs) inay qaataan siyasado iyo habab loo midoobay Guddiga Bayaanka Basel Mabaadiida ku Saabsan Lacagta La Dhaqay inay si degdegsiimo u soo jeediyan:

- ♦ Aqoonsi munaasab ah ee qofkasta, ee la sameeynaya macaamil ganacsi ah hay'adaha maaliyadda.
- ♦ Anshax sare ee macaamil maaliyeed iyo u hoggaansanaan sharciyada iyo xeerkarka xukumayo macaamilka maaliyadda.
- ♦ Isla shaqeynta dadka fulinaya sharciga.
- ♦ Macluumaad iyo tababaro la siiyo shaqaalaha si loo xaqijiyo inay sameyn karaan mabaadi'daas.

### Sugidda Xiriirka Qofka Macaamilka

Aqoonsi aad loo adkeeyey ee qofka macaamilka iyo hubsasho qorsho iyo howlful waxay u noqon karaan haya'adaha maaliyaadda hubka ugu wax tar weyn u leh ka hortagga lacagta la dhaqay. Warsashada haboon ee aqoonsiga iyo hubinta macalumaa arrimaha qaarkood, iyo in laga foojignaado waxyaabo aan caadi ahayn ama macaamil xawilaad oo shaki ku jiro waxay taageeri karaan Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed (MSB) inay ka helaan iyo inay ka ogaadaan nidaamka lacagta lagu dhaqay.

Aqoonsiga qofka macaamilka iyo xaqijiintaa qorshaha loo jaangooyey shaqo socodsii ee u gaar ah shaqo

ganacsi oo gaar ah:

- ♦ Taageerid ogaansho falal shaki ku jira ay dhacdo waqt go'an.
- ♦ Abaabul hoggaansanaan dhammaan dowladaha iyo sharciga Federalka oo loogu isticmaali kara adeegyada sameeya shaqo ganaci lacageed.
- ♦ Abaabul ammaan iyo kalsooni xirfad ku shaqayn shaqo ganaci.
- ♦ Yareey khatarta haddii Adeegyada Sameeya Shaqo Ganaci Lacageed (MSB) ay sameeyaan falal sharciga aan waafaqsanayn.
- ♦ Dhin khatarta dowladda qabashada ama ganaaxa ee raasumaalka la xiriira xawaaladda qofka macaamilka ah (sida ka dhexmuuqata jeega wareega / jeega socotada iyo lacag u taagan in la xawilo) marka qofka macaamilka lug ku leeyahay falal dambi.
- ♦ Daafac sumcadda adeegyada shaqo ganaci.

## Fayl-gareyn Warbixinnada Falalka Shakiga Dhulinaya

Falalka Shakiga Dhulinaya (SAR) waa kuwa hubka dawladda ugu muhiimsan dagaalka lagula jiro lacagta la dhaqay iyo kuwo kale fal dambiyeed iyo kuwo kale ee faldambiyeed ee la xiriira maaliyadda. Warbixintaasi waa furaha qaybaha sida laga rabo ka hortagga qorshaha hoggaansanaanka lacagta la dhaqay.

Kuwo badan oo Adeegyada Sameeya Shaqo Ganaci Lacageed waxaa laga rabaa inay u fayl-gareeyaan Warbixinta Falalka Shakiga Dhulinaya (SAR) markay ka shakiyaan inay dhab ahaan jиро falal ka soo horjeeda sharciga inay dhacday iyo markay falalkaasi gaareen wax micno leh oo u baahan in la wargeliyo.

Noocyada Adeegyada Sameeya Shaqo Ganaci Lacageed (MSBs) oo lagu dabaqayo adeegyada MSB. Warbixinta Falalka Shakiga Dhulinaya (SAR) oo laga rabo waa:

- ♦ Gudbin lacag
- ♦ Ganaci lacageed ama iskubeddel lacageed
- ♦ Jeega wareega-kuwa soo saara, kuwa ibiyo ama kuwa dibugato.
- ♦ Jeega socotada-kuwa soo saara, kuwa ibiyo ama kuwa dibugato
- ♦ Adeegyada Boostada Mareykanka

Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Falal Dambiyeedka la Xiriira Maaliyadda (FinCEN) waxay qadarinaysaa inay dib u saxdo xeerarka Warbixinta Falalka Shakiga Dhulinaya (SAR) in laga rabo qolada jeegaga lacagta caddaanka qaadato inay warbixiyaan falalka shakiga ku jiro.

Adeegyada Sameeya Shaqo Ganaci Lacageed (MSBs) oo sameeyo adeegyada qiimaha keydsan ma looga baahno inay ka soo bixiyaan falal shaki dhulinayo waqtiga hadda xaadirka ah.

Tixraac [http://www.fincen.gov/financial\\_institutions/msb/](http://www.fincen.gov/financial_institutions/msb/) haddii aad dooneysid casriyenta marka Adeegyada Sameeya Shaqo Ganaci Lacageed ee laga rabo inay u fayl-gareeyaan Warbixinta Falalka Shakiga Dhulinaya (SARs)

Adeegyada MBS waa inay u fayl-gareeyaan Falalka Shakiga Dhulinaya haddi uu macaamilka yahay labadaba:

- ♦ Oo shaki laga qabo iyo
- ♦ \$2,000 oo doolar ama ka badan (\$5,000 doolar ama ka badan kuwa soo saarayo oo dib u hubin iyo xaqijin diiwaangelin)

Adeegyada Shaqo Ganaci Lacageed (MSB) waa inay u fayl-gareeyaan Warbixinta Falalka Shakiga Dhulinaya (SAR) 30 maalin gudahood marka la oogaado inuu shaki ku jiro macaamil lacageed.

Adeegyada (MSBs) oo aan lagu dabakhayn Warbixinta Falalka Shakiga Dhulinaya sida kuwa soo saara, ibiye, ama dibugato qiimaha kaydsan, hadday doonaan way u soo fayl-gareeyan karaan Warbixinta Falalka Shakiga Dhulinaya (SAR) falal shaki ku jiro ka hooseeya xadka warbixinta laga rabay .

Waa sharci darro in loo sheego qof ku lug leh macaamil lacageed in loo fayl-gareeyey Warbixinta Falalka Shakiga Dhulinaya (SAR). In la qariyo Warbixinta Falalka Shakiga ku jira waxay ka hor istaagi dadka laga shakiyo oo ku lug leh falal dambiyed inuu helo hab uu kaga baxsato qabashada dadka ku howlan fulinta sharciga. Tani xitaa waxay saacidi Adeegyada Shaqo Ganaci Lacageed (MSB) oo fayl-gareeynayo warbixin. Warbixinta Falalka Shakiga Dhulinaya (SAR) iyo/ama macluumaadka ku jiro Warbixinta Falalka Shakiga Dhulinaya. Waa in la siiya keliya Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortago Falalka Dambiyeed ee La Xiriira Maaliyadda (FinCEN) ama kuwo kale oo ku haboon fulinta sharcigaa ama wakiilka kormeerka marka la waydiisto.

Macaamilo qaarkood oo shaki ku jira waxaa layskarabaa in si dhaqsi ah logga qaado facil. Haddii Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed ( MSB) ay qabto sabab ay uga shakiso xawaaladda qofka sameynayo, ee looga yaabo inuu xiriir la lahaan karo argagixiso oo ka soo horjeeda Mareykanka. Adeegyada (MSB) waa inay is dhaqsi u wacaan Khatka toosan ee Hay'adaha Maliyadda 1-866-556-3974.

Sidoo kale, haddi ay jирто shaki in la sameeyey xadgudub sharci-sida haddi ay jирто nidaam socdo iskudubaridan ee la xiriira lacagta la dhaqay- waxaa layska rabaa si dhaqsi ah in loo siyo taxatir weyn. Adeegyada, waa inay siiyan ogeysiin haya'daha ku haboon fulinta sharciga. Sikastaba, Adeegyada (MSB) waa iney u fayl-gareeyaan Warbixinta Falalka Shakiga Dhalinaya (SAR) haddii Adeegyada (MSB) ay ku khasbanyihii inay waajib ku tahay iney bixiyaan warbixin. Waxkaqabatka Layskarabo Sirqarinta Bangiga (oo lagu magacaabo "ammaan magangelin") waxay siin daafacaad masu'uulka ka saaran madani Adeegyada (MSBs) iyo shaqaalahooda oo u fayl-gareeynayo Warbixinta Falalka Shakiga Dhalinaya (SAR) ama warbixinta dhalinaya falal laga shakinayo.

### **Waa Maxay "Falal Shaki Ku Jiro"**

Warbixinta Falalka Shakiga Dhalinaya (SAR) waa in a fayl-gareeyan Adeegyada (MSB) ku daboolan marka adeegyada ay ogyihiin ama ay qabaan sabab ay ku shakiyaan marka macaamil lacageed ama ay jирто naqshad macaamilo oo shaki ku jiro iyo in ay lug ku leedahay \$2,000 doolar ama wax ka badan. Macaamilka laga shakiyo waa hal ama wax ka badan kuwo soo socda:

- ♦ Oo ku- lug leh raasumaal ka yimid falal aan sharci ahayn ama loogu talagalay ama lagu wado si loo qariyo ama looga leexiyo maalgelinta ama raasumaalka oo ka yimid falal aan sharci ahayn.
- ♦ Oo loo qorsheeyey in laga baxsado Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA) sikastaba ha ahaato qaaab dhismo ama micna kaleba.
- ♦ U muuqata inaysan ahayn shaqo ganaci ama wax waafaqsan sharciga, iyo adeegyada (MSB) ay ku tilmaami karaan inaysan qabin micno macquul ah, ee macaamilka xawilaada kaddib markii ay baaraan dhammaan arrimaha u muuqda.
- ♦ Oo ku lug - leh isticmaal shaqo ganaci lacageed oo fududaynaya falal dambi.

Dhammaan Adeegyada (MSB) waa inay qabaan hab ay ku shaqeeyaa si ay u hubiyaan Warbixinta Falalka Shakiga Dhalinaya (SAR) in loo fayl-gareeyey marka ay habboon tahay.

Marka shaqaalahoo adeegyada (MSB) ay ka shakiyaan qof inuu ku jiro lacag dhaqid, oo ku howlan inuu sameeyo macaamilo xawilaad isagoo damacsan inuu ka dhuunto waxayaabihii laga rabay. Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA) ama uu sameeynayo xawilaad aan ka muuqan wax sharciga waafaqsan ee aan lahayn sabab fiican oo la garan karo ama isticmaal adeegyo ganaci lacageed si loogu fududeeyo falal dambi qofka shaqaalahoo ah waa inuu soo wargeliyaa falalka isaga/ iyada maamulahisa ama sarkaalka masuulka ka ah. Kaddib, haddii ay adeegyada ay u arkaan in loo baahan yahay in loo fayl-gareeyo Warbixinta Falalka Shakiga Dhalinaya (SAR), waa in loo fayl-gareeyo Warbixinta Falalka Shakiga Dhalinaya (SAR) waana inay hayaan nuql illaa 5 sanadood. Dokumentiyaasha taageeraya, sida xusuusta macaamilka xawilaadda lacagta, waa in lagu hayaa oo lagu lifaaqo koobiga foomka la fayl-gareeyey taasoo la haynayo illaa 5 sannadood laga soo bilaabo maalinta warbixinta la fayl-gareeyey.

### **Maxay Yihii "Hantida Ka Timid Falal aan Sharci Ahayn"**

Ooraahda "hantida ka soo jeedo falal aan sharci ahayn" micnaheedu waa lacag lagu maamulay fal dambiyeed.

**Tusaale:** Qofka daroogada iibinayo wuxuu ka iibiyay qof daroogo isticmaalo qiimo \$500 doolar oo dararog ah, Lacagtaa ka timid iibinta daroogada, \$500 doolar waxaa lagu howl fuliyay iibin dorooga "waa raasumaal ka soo jeeda falal dambiyeed".

### **Maxay Yihii Macaamilka Lacageed oo Loo Qorsheeyey In Lagala Dhuunto Waxyabaha Ay Rabto Warbixinta Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA)?**

**Tusaale:** Qof macaamila ah ayaa doonaya lacag \$11,000 doolar oo caddaan ah inuu ku sameeyo xawaalad isagoo doonayo inuu siyo laaluush shaqaalahoo adeegyadada (MSB) si aan loogu fayl-gareyn Warbixinta Macaamil Ganaci Lacageed (CTR).

## Maxay Tahay Macaamilka aan sameeyneyn Shaqo Ganacsi ama u Muuqan Wax Sharciga Waafaqsan?

Waxaa laga yaabaa macaamilo lacageed qaarkood in lagu sameeyyo hab u muuqata si aan caadi ahayn ama shaki ku jira. Siday ahaataba, waxaa u sii dheer arrimo haddii ay ogadaan dadka la siinayo warbixinta shaqo ganacsi, waxaa laga yaabaa inay ku jirto kashifaat macquuul oo sal leh markii hore u muuqaneyso wax aan caadi ahayn ama shaki ku jiro.

**Tusaale:** qof macaamil oo ah macalin ka gabay shaqada, ayaa marar badan diro ama helo lacag xawilaad ah oo ka badan \$2,000 doolar taasoo uga imaaneysyo dadyow kala duwan. Adeegyada (MSB) waxaa laga yaabaa hor ahaantibo inay u arkaan macaamilka xawilaadaha wax shaki ku jira maxaa yeelay waxay u muuqataa "inay ahayn shaqo ganacsi macaalim ama aan waafaqsanayn sharciga iyo maxaa yeelay uma eko inay ka soo jeedaan ilo sharcii ah." Sikastaba, haddii la hayo macluumaad dheeraad ah adeegyada waxay u arki karaan arrin shaqo ganacsi ah. Tusaale: macallinka oo ka gabay shaqada waxaa laga yaabaa si joogto ah inuu ugu isticmaalo xaraashka lagu sameeyo Internetka inuu iibsado oo haddana gado alaaboo qaali oo qaraami ah.

## Maxay Tahay Macaamilka Xawaalo oo ku lug-leh Adeegyada Sameeyo Shaqo Ganacsi Lacageed (MSB) oo u fududaynayo Falal Dambiyeed?

**Tusaale:** Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed (MSB) waxay ka shakin qof macaamil ah inuu u dirayo xawaalad lacag ah asagoo ku yaboohayo urur argagaxiso ah. Waa muhiim in la xusuusto baaxadda weyn ee kelia, sida lacag caddaan oo aad u badan macaamilkeed xawilaad, waa inaysan ahayn arrin lagu go'aansado in loo fayl-gareeyo "Warbixinta Falalka Dhulinayo Shakiga" (SAR). Waxyabaha keenayo go'aankaasi, waxay ahaataba, waxaa ku jira arrimaha soo socdo: Baaxadda, inta mar soo noqnoqoshada iyo nooca macaamilka xawiladda. Adeegyada (MSB) khibrada ay u qabaan macaamilka ama shaqsiyo kale ama ururro ee la xiriira macaamil lacageed (haddi ay jirtaba); iyo nooca xeeraka xawilaadaasi ku jirto (MSBs) laynka ganacsi iyo nawaaxiga joqaraafiga.

## Calanka Gaduudan

Marka hal wax kelia bixiso calaamo inuu macaamilka xawilaadda aan ahayn wax caadi ah ama laga yaabo inay ku jirto "shaki" waxaa la dhahaa "calanka gaduudan."

**Tusaale qaar ka mid ah calanka gaduudan caadi u ah.**

**Qofka macaamilka Aqoonsiga ama macluumaad:**

- ♦ Qofka macaamilka wuxuu isticmaalayaa aqoonsi been ah
- ♦ Laba/ama in ka badan ee dad macaamil ah waxay isticmaalayaan aqoonsi isku eg.
- ♦ Qofka macaamilka wuxuu beddelayaa nooca xawilaada markuu ogaado isaga/ayada in laga rabo inuu tuso aqoonsi.
- ♦ Qofka macaamilka wuxuu beddelayaa sida loo hingadinayo isaga/yada magacooda buuxo.

**Macaamilo xawaalad oo hoos imaanaya warbixin ama diiwaangelin xadka ugu dhow ee laga rabo.**

Qofka macaamilka wuxuu sameynayaa macaamil xawilaad oo ka hooseyso xat ka hooseeysa inta laga rabo

- ♦ Lacag beddelaad oo ka hooseyso \$1,000 doolar
- ♦ Lacag caddaan ah oo gadasho jeega wareega ama jeega socotada ee ka hooseyso \$3,000 doolar

**Shakhsiyo badan ama meela badan:**

- ♦ Labo ama in kabaden ee macaamil waxay ka shaqeynayaan inay jajabiyaan labo ama wax ka badan xawaalad si ay uga dhuuntaan warbixinnda iyo diiwaangelinta ay ka rabto Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA).
- ♦ Qof macaamil ah wuxuu isticmaalayaa laba ama wax ka badan meelo ama khasnajiyo kala duwan isla hal maalin siduu u kala jijibyo una yaryareeyo xawilaadda isagoo ka dhumanayoo warbixinta iyo diiwaangelinta Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA).

**Dhaqan Sharcidarro aan qarsoodi ahayn ee sameeynayo qofka macaamilka ah:**

- ♦ Qofka macaamilka wuxuu bixinayaa laaluush ama bakhshiish.
- ♦ Qofka macaamilka wuxuu qiranayaa inuu sameeyey faldambi.

Adeegyada Sameeya Shaqo Ganaci (MSB) oo si sax u xaqiijiyo ama xareyo qofka macaamilka aqoonsiga, waxay u badan tahay inay aqoonsadaan inay jirto falal shaki ku jiro oo loo baahan yahay in la wargeliyo.

## Maxay Adeegyada (MSBs) raadinayaan?

Dhaqidda Lacagta nidaamyadeeda si aad ah ayey u ballaarantahay. Waxkaqabatka ugu weyn ee Federalka ee falalka lacagta la dhaqay waxay mar shiishka u saarneyd aqoonsiga iyo dokumentooyinka ee xawilaadaha lacagta badan.

Mar dhow, dadaalka dhabargoonta lacagta la dhaqay wuxuu ku jeeday isticmaalka lacagaha la xawilo, labadaba bangiyada iyo hababka kale ee aan bangiyada ahayn, iyo si kale hanti lacag ah lagu gudbiyo. Maanta, dadka lacagta la dhaqay lug ku leh waxay noqdeen dad khibrad ilbaxnimo dheerad leh, dhammaan nooc waliba ee macaamil xawaalad lacageed waxay la kulmayaan baaris xeel dheer. Arrimaha soo socda waxaa dhici kartaa inay tilmaamayso lacagta la dhaqay ama falalka sharci aan ahayn.

Liisaskani ma aha wax dhammaystiran, laakin waxaa dhici karta inay wax taraan Adeegyada Sameeya Shaqada Ganaci Lacageed (MSB) inay ku aqoonsadaan habka dadka lug ku leh lacagta la dhaqaylug iyo dambiliyaal kale oo isku dayo inay u isticmaalaan falalka lacagta la dhaqayo.

### Iskudeyidda In laga Baxsado Warbixinta ama xusuushaynta ay dooneysyo Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA)

Qofka macaamilka ah wuxuu damci karaa inuu ka hayo macaamliisa xawilaadda in ka hooseeyso xadka laga doonayo in laga bixiyo warbixin iyo in la diiwaangeliyo.

- ♦ Qofka macaamilka ah ama koox macaamilo ah oo isku daynayo inay qariyaan xawilaadda lacag baaxad wayn iyagoo u kala jajabinayo qaybo badan, xawaalad yar-yar, iyagoo sameeynayo xawaalado yar-yar.
  - Waqtio kala duwan ee isla maalin ah
  - Iyago isticmaalaho khasnajiyaal kala duwan ee Adeegyada Sameeya Xawilaada (MSB) isla maalin gudaheed ama maalmo kala duwan
  - Laamo badan isla adeega sameeya xawilaadda, isla maalin gudaheed ama maalmo kala duwan.
- ♦ Qof macaamil ah ama koox macaamilo ah oo sameeyey xawilaado isku mid ah maalmo badan iyagoo ka hooseeyo xadka laga rabo in laga bixiyo warbixin iyo xusuus hayn. Tusaale, qofka macaamilka ah waxaa laga yaabaa:
  - Inuu gato jeega wareega wax ka yar \$3,000 doolar maalmo kala duwan
  - Inuu gato jeega socotada in ka hooseysa \$3,000 doolar maalmo badan.
  - Inuu billaaboo inuu sameeyo xawilaado oo qadanayo isla qofkii, xawilaad kastana ka hooseysa \$3,000 doolar taasoo uu sameeynayo maalmo badan.
- ♦ Qofka macaamilka ah oo diidan inuu bixiyo macluumaadka loogu baahan yahay warbixinada ama xusuushaynta u baahan ama sharciga ama nidaamka howsha shirkadda.
- ♦ Qofka macaamilka oo diidan inuu sameeyo xawilaad markii loo sheegay in warbixin ama xusuushayn la fayl-gareeyn doono.
- ♦ Qofka macamilkia oo u jajabiyo lacag badan in yar-yar xawiladeeda kaddib markii loo sheegay in la fayl-gareeyn doono ama la diiwangelin doono.
- ♦ Qofka macaamilka oo tusa aqoonsiyo kala duwan markasta uu sameynayo macaamil xawilaad lacag.
- ♦ Qofka macaamilka oo u hingadinayo isaga/iyada magaca si kale duwan mar waliba isaga/iyada wax xawilayo ama loo soo diray xawaalad ama u gadanayo jeega socotada.
- ♦ Qof kasta ama koox kasta oo laaluushayo ama damco inay laaluushaan shaqaalaha Adeegyada Sameeya Shaqo Ganaci Lacageed (MSB) inaan laga fayl-gareyn foomamka warbixinata ama laga keydin diiwaangelin oo looga baahan yahay sharciga ama nidaamka shirkadda
- ♦ Qof kasta ama koox kasta ku khasba ama isku daya inay khasbaan shaqalaha adeegyada inaan laga fayl-gareynin foomka warbixinata ama laga deydin diiwaangelin oo looga baahan yahay sharciga ama nidaamka shirkadda.
- ♦ Qof macaamil oo helo tiro badan oo xawaalo ah oo u muuqato inay la xiriit qaab qorshaysan ee lagu habeeey in looga baxsato warbixinata iyo xusuushaynta looga baahan yahay.
  - Isla qofka macaamilka oo dira xawilaad kasta tiro ka hooseysa \$3,000 doolar (wax kale oo ka hooseeya xatka laga doonayo diiwaangelin).
  - Kuwa badan oo macaamil ah oo ka diraya xawilaad isla hal meel oo Adeegyada (MSB) ayadoo u dhhexeysa labadiiba daqiqado, xawaalad kastana tirada waa wax ka hooseysa \$3,000 doolar (wax kale oo yar oo muuqdo).
- ♦ Qof macaamil oo qaadanayo alaaboo badan oo lacageed (jeega wareega, jeega socotada, jeegaga la

sarrifto, waadiro waddamo shisheeyo) taasi waxay u muuqan in lagu gatay qaab la qorsheeyey (Tusaale, tiro kasta way ka hoooseysa \$3,000 doolar).

**Qofka macaamilka oo bixiyo waxaan kaafi ahayn ama/yo macalumaad laga shakiyo.**

Shaqsii waliboo iyo macaamil shaqo ganacsi kasta oo isku dayo in la baxsado inay bixiyaan aqoonsiga layska rabo sida:

- ♦ Shaqsii macaamil ah oo aan doonaynin ama awoodin inuu bixiyo aqoonsii ama macluumaad.
- ♦ Shaqsii macaamil oo bixiyo aqoonsi macluumaad kala duwan mar waliba " isaga/iyada oo sameeynayo macaamil xawaalad lacag.
  - Magac kala duwan ama hingaadin magaca xarfo kala duwan.
  - Cinwaan kala duwan ama hingaadin ama nambar kala duwan ee cinwaan.
  - Aqoonsi nooc kala duwan.
- ♦ Shaqsii macaamil oo aan lahayn meel ciwaan oo u muuqata meesha inuu deggan yahay sababtoo ah isaga/iyada oo ah qof macaamil soo noqnoqdo.
- ♦ Aqoonsiga runta ah oo u muuqata in la beddelay.
- ♦ Dokumentiga aqoonsiga oo sheegayo shaksiga inuusan u ekeeyn muuqaalka qofka macaamilka.Tusaale: Da'da, dhirirka, midibka indhaha, jinsiga) .
- ♦ Aqoonsi oo taariikhdu dhacday.
- ♦ Shakhsii macaamil oo tuso waxaan caadi ahayn ama aqoonsi ama macluumaad shaki ku jira.
- ♦ Macaamil shaqo ganacsi oo diidan inuu keeno macluumaad dhamaystiran oo la xiriira: nooca shaqada ganacsi, ujeedada macaamilka, ama macluumaad kale oo warsaneeyso Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed (MSB).
- ♦ Qofka laga filayo inuu noqdo macaamil shaqo ganacsi oo diidayo inuu bixiyo macluumaadka inuu u qalmo qiimo ka dhimid shaqo ganacsi (ama ka doorbidid qorsho macaamil oo bixiso Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed.)

**Falalka is khilaafaya ee macaamilka shaqadiisa ganacsi ama xirfadiisa.**

Fiiri tusaale ahaan habudhaqanka macaamilka iskhilaafaya sida:

- ♦ Shakhsii macaamil wuxuu Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi (MSB) la sameeynayaa macaamil xawaalad lacago aad u badan oo khilaafsan dakhligisa uu ka helo xirfaduu hayo.
- ♦ Macaamil shaqo ganacsi wuuxuu mashquul ku yahay macaamil xawaalad oo mar waliba uu isticmaalayo lacag xaashi ah oo waaweyn marka loo fiiryo nooca shaqa ganacsi uu sameeynaya, uma aha sabab lagu qanco siduu u dhaqmayo.
- ♦ Shakhsii ama macaamil shaqo ganacsi wuxuu qaataj lacag tira badan ee jeeg qof saddexaad.
- ♦ Qof macaamil ah wuxuu ku gadanayaa lacag caddan ah jeega wareega, jeega socotada ama alaaboo lacageed oo khilaafaya macaamilka shaqo ganasigiisa ama xirfadiisa.
- ♦ Shakhsii macaamil ganacsi wuxuu isticmaalayaa hab bixin lacag ah oo khilaafaya haddii loo fiiryo guud ahaan shaqada ganacsi oo uu sameeyo (Tusaale, wuxuu ku dhiibayaa Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed (MSB) adeegyadooda jeega wareega, jeega socotada, ama jeeg qof saddexaad.
- ♦ Shakhsii macaamil ganacsi wuxuu dirayaa ama uu ka helayaa xawaalad dad kale ee waddamo shisheeye, iyadoon u muuqan sabab shaqo ganacsi ama siin karo sabab khilaafsan macaamilka shaqada ganasigiisa.
- ♦ Shakhsii macaamil ganacsi wuxuu dirayaa ama ka helayaa lacag xawaalad dad kale ee waddamo shisheeye marka nooca macaamilka shaqada lug ku lahayn xawilaadda caalamiga.

**Sifooyin ama falal aan caadi ahayn, sida:**

Ogow sifooyin walba ee aan caadiga ahayn, sida:

- ♦ Shakhsii macaamil ah ayaa wuxuu soo gadanayaa badeeco/adeegyo si caadi ah laakin waxay u muuqata inuusan ku noolayn ama ka shaqayn nawaaxiga adeegyada sameeyya shaqo ganacsi lacageed.
- ♦ Qofka macaamilka ah wuxuu siinayaa adeegyada (MSB) badeeco ama adeegyo isagoo isticmaalayo lacag xaashi ah oo ka muuqata wax aan caadi ahayn amba laga urin karo wax kimikal ah
- ♦ Qofka macaamilka ah wuxuu ku bixinaya badeecad/ adeegyada (MSB) jeega wareega ama jeega socotada iyadoo saxiix ka muuqan wajiga alaabta lacageed (Tusaale, jeega wareega kuma qorna qofka la siinayo iyo jeega socotada aan sixiix lahayn ama ka daba saxiixid si loo xaqijiyo dhabahaanta saxiixyada.)
- ♦ Qofka macaamilka wuxuu ku bixinaya Adeegyada (MSB) isagoo isticmaalaya jeegaga wareega ama jeegaga socotada ee summadaha caadi aan lahayn, tikidho ama qoritaan gaaban (sida xarfaha billowga magaca) oo ku taala midkood wajiga ama dhabarka dambe ee alaabaha lacageed.
- ♦ Qofka macaamilka ah wuxuu iibsanaya lacag xawaalad, jeega wareega, jeegaga socotada i.w.m.ee tiro aad u badan ee lacag caddaan ah marka adeegyada (MSB) aysan waydiisaneyn in lagu bixiyo lacag

caddaan ah.

- ♦ Shakhsii macaamil ama macaamil shaq ganacsi waxay dalbanayaan inay iibsadaan jeeegaga socotada ama jeega wareega tiro aad u ballaaran ee xirmo waaweyn ah.
- ♦ Qof macaamil ah wuxuu iibsanayaa tiro lacag xawaalad, jeega wareega ama jeega socotada ee tiro aad u badan ama in qayaxan oo ka hooseysa in aad u yar sabab la'aan.
- ♦ Qofka macaamilka wuxuu si noq-noqosho ah u beddelayaa warqadaha lacag yar yar kuwo warqadaha lacag waaweyn ama bilcakso, marka qofka macaamilka si caadiga ah uusan u isticmaaleeyn lacag caddaan ah markuu rabo inuu wax iibsdoo.
- ♦ Qofka macaamilka wuxuu dirayaa ama helayaa lacag xawilaad oo tiro ahaan isku mid ah oo isku waqtii ah am waqtii isku dhow.
- ♦ Qofka macaamilka wuxuu helayaa tiro yar-yar ee lacag xawilaad ah isla maalin ama maalmo badan gudaheed oo ka iman hal ama ka badan xawaalad lacag ee qof ku nool waddan kale ama magaalo kale taasoo u dhow tiro isku mid ah.
- ♦ Qofka macaamilka wuxuu dirayaa ama helayaa si noq-noqosho ah lacag xawilaad ee aad u ballaaran oo ka iman ama ku socoto dadyow oo ku nool waddan shisheeyeye gaar ahaan kuwa ku qoron liiska waddamada aan lahayn xiriir wada shaqayn.
- ♦ Qofka macaamilka ah wuxuu helayaa lacag xawilaad ah ee isla markiiba wuxuu iibsanayaa alaaboo lacageed oo loo diyaariyey in la siiyo qof saddexaad.

#### Beddelaad macaamil ganacsi lacageed ama naqsho macaamil ganacsi lacageed

Ka digtoonoow isbeddelka waxqabashada sida:

- ♦ Isbeddelo wayn habudhaqanka qofka macaamilka , Tusaale:
  - Shakhsii macaamil oo gato jeega wareega wuxuu billaabayaan inuu iibsdoo toddobaad kasta tiro isku mid ah ee jeega wareega (isaga/iyada oo markii hore iibsan jiray jeega wareega maalinta lacagta la qaato inuu ku bixiyo ijaarka, korontada iyo biyaha iwm).
  - Shakhsii macaamil wuxuu keenayaa lacag xaashi ah oo waaweeeyn (halkii markii hore isaga/iyada soo sarrifi jiray jeega mushaaradooda iyagoo ku gadan jireen alaaboo lacageed ama xawaalad).
- ♦ Si lama filaan ah oo aan joogto ahayn isbeddelo xawilaad lacag la diro ama la helo.
- ♦ Kordhin deg-deg ah baaxad weyn iyo soo noq-noqosho lacagta qof macaamil gaar ah ee isticmaalay.

#### Shaqaalahaa

Fiiri habudhaqanka shaqaalahaa sida:

- ♦ Shaqaalahaa Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed (MSB) oo hannanka noloshooda oo aan ku filnayn iyada/isaga mushaaradooda, oo laga yaabo inay qateen bakhsishii ama laaluush.
- ♦ Shaqaalahaa diido inuu qaato fasax oo laga yaabo isaga/iyada ee oggolaado ama lagu khasbo inuu u sameeyo adeegyo hal ama in ka badan qof macaamil ah iyagoo lagu sameynayo xadgudub qorshaha howleed ee shirkadda.
- ♦ Shaqaale oo lug ku leh macaamilo lacag aad u badan oo aan caadi ahayn ama macaamilo lacageed ee tiro badan aan caadi ahayn oo laga yaabo inay muujinayso isaga/iyada inuu ogol yahay ama lagu khasbay inuu u sameeyo adeegyada hal ama macaamilo badan iyagoo lagu xadgudbayo qorshaha howleed ee shirkadda.

Arrimaha nooca aan ku soo sheegnay qaybtan waxaa laga heli karaa, haddii baaris dheeraad ah la warsado, si ay u noqoto dhammaan si sharci ah. Isla xusuustan arrimo kale oo aan lagu soo qaadin halkani waxaa laga yaabaa inay ku jirto shaki haddi ay isbeddesho waxqabashada caadiga ah ee qofka macaamilka ah ama shaqaalahaa gaar ah. Adeegyada Sameeyo Shaqo Ganacsi Lacageed (MSB) ama shaqaale Adeegyada (MSB), waa inaad adigu sameysaa ka gar-naqid oo macquul ah.

## Adeegyada (MSBs) Siyaabo Kale Ayeey Wax u Saacidi Karaan

Adeegyada (MSBs) waa inay u hoggaansamaan xusuushaynta xeerarka iyo diiwaangelinta Waxqaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA). Kuwa soo socda waxay tilmaamayaan waxa.layska rabo qaarkood.

#### Fayl-gareeynta Warbixinta Ganacsi Lacageed (CTRs)

Adeegyada (MSB) waa inay fayl-gareeyaa warbixinta macaamil kasta ee lacag oo ku lug leh lacag caddaan ah oo soo gasho ama baxda in ka badan \$10,000 doolar oo loo maray ama sameeyeen Adeegyada (MSB) maalin un isla qof ama qof matalayo (Fiiri 31 CFR103.22).

Sidaa Darteed, waxaa loo baahan yahay Warbixinta Macaamil Ganacsi Lacageed (CTR) marka macaamil ganacsi lacageed uu la kulmo shuruudaha soo socda:

- ♦ Lacag ahaan
- ♦ Ka badan \$10,000 doolar ha ahaato lacag caddaan oo soo gashay ama baxday
- ♦ Isla qofki ama qof kale isaga matalayo.
- ♦ Oo ay dhacday isla hal maalin ganacsi gudaheed.

#### Isku Dar

Macaamilo lacageed oo badan ee sameeyey qof ama qof isaga matalayo isla maalin waxaa loo tixgelinaya inay tahay hal macaamil ganacsi lacageed, sida Warbixinta Ganacsi Lacageed ee u qasдинеесо. Si kale haddi loo dhaho, Adeegyada (MSB) waa inay u fayl-gareeyaa Warbixinta Macaamil Ganacsi Lacageed (CTR) hadday ogtahay in qofka macaamilka oo isku daray lacagta soo gashay iyo tan uu dirayo in ka badan \$10,000 doolar isla maalin gudaheed.

#### Lacagta caddaanka soo gashay iyo tan baxday

Macaamilka lacagta caddaanka soo gashay waa in lagu daraa macaamilka lacagta caddaanka baxday si loo ogaado ujeedada warbixinta macaamil ganacsi lacageed (oo ka badan \$10,000 doolar) in lagu sameeyay isla hal maalin ganacsi gudaheed.

#### Fayl-gareynta Warbixinta Macaamilka Ganacsi Lacageed (CTR)

Warbixinta Macaamil Ganacsi Lacageed (CTR) waa foom IRS 4789 Adeegyada Soo Uruuriyo Dakhliga Gudaha- waxaana laga heli karaa [http://www.fincen.gov/financial\\_institutions/msb/](http://www.fincen.gov/financial_institutions/msb/) ama u wac IRS Form Distribution Center 1-800-829-3676. Foomamka waa in lagu fayl-gareeyaa 15 maalin gudahood laga soo bilaabo maalintii la sameeyey mucaamilka ganacsi.

Warbixinta Macaamil Ganacsi Lacageed waxay uga baahan tahay adeegyada (MSB) inay:

- ♦ Hubiyaan oo ay diiwaangeliyaan aqoonsiga qofka macaamilka ah.
- ♦ Helaan macluumaadka macaamilka ganacsi lacageed.
- ♦ Dhammaystiraan oo ay fayl-gareeyaa Warbixinta Macaamil Ganacsi Lacageed (CTR).
- ♦ Hayaan nuqulka ee Warbixinta Macaamil Ganacsi Lacageed (CTR) illaa 5 sannadood laga soo billaabo maalintii la faly-lareyey warbixinta.

#### In La Hayo Diiwaangelinta

Alaabaha lacageed "diiwaan" - libsasho lacag caddaan ah ee jeega wareega -jeega socotada iyo alaaboojin kale lacageed

Adeegyada (MSB) oo iibinayo jeega wareega, jeega socotada, ama alaaboojin kale lacageed ee lacag caddaan ah waa inay hubiyaan aqoonsiga qofka macaamilka ah iyo inay sameeyaa oo ay hayaan qoraal diiwan gelin iibsi waliba marku iibsigu lug ku leeyahay lacag caddaan ah inta u dhexeysa \$3,000 doolar illaa \$10,000 doolar iskudarkooda. (Fiiri 31CFR103.28), sidaa darteed waxaa loo baahan yahay marka:

- ♦ Lacagta caddaanka ah ee soo gashay ay tahay \$3,000 doolar -\$10,000 doolar iskudarkood iyo
- ♦ Lacagta caddaanka ah ee soo gashay waxaa loogu talagalay in lagu iibsado jeega wareega, jeega socotada, ama alaaboo kale ee lacageed.

Alaabaha Lacageed "Diiwaan" oo layska rabo waxay u baahan yihiin Adeegyada (MSB) inay:

- ♦ Hubiyaan iyo inay diiwaangeliyaan aqoonsiga qofka macaamilka ah
- ♦ Diiwaangeliyaan macaamilka ganacsi lacag ee la sameeyey (mid kasta ee jeega wareega, jeega socotada ama alaaboo kale ee lacageed oo la iibsaday: tirada, nambarada taxan iyo taariikhda la gaday).
- ♦ Inay hayaan qoraalka diiwaangelinta illaa 5 sannadood laga soo bilaabo maalintii la sameeyay macaamilka ganacsiga lacageed.

Qaunuunka Lacagta xawilaadda oo loogu tala galay qofka dirayo lacagta xawilaadaha.

Adeegyada (MSB) oo ogolaanayo tilmaam bixin inay diraan xawilaad lacag ee \$3,000 doolar ama wax ka badan, waa inay hubiyaan aqoonsiga qofka macaamilka ee diraya lacagta, waana inay sameeyaa qoraal diiwaangelin ee lacagta xawilaadda , iyadoo loo firin habka lagu bixiyay ( Fiiri CFR103.33(f))

Taasoo u si dheer, macluumaadka qaarkood waa inay u socdaan siday yihiiin, Adeegyada (MSB) waa inay diraan macluumaadka qaarkod, kan ku sii xiga ama hay'adda sameeynaya xawilaadda.

#### Dadka loo soo xawilay lacagta

Adeegyada (MSB) oo oggolaaday tilmaansiin inay bixiyaan lacag xawaalad ee \$3,000 doolar ama ka badan waa inay hubiyaan aqoonsiga qofka macaamilka ah ee qadanayo lacagta, waa inay sameeyaa ayna hayaan qoraal diiwaangelin lacagta la xawilay iyadooon loo firin sida lagu bixiyay.

#### Waxyaabaha looga baahan yahay diiwaangelinta lacagta la gudbinayo:

- ♦ Hubi aqoonsiga qofka macaamilka ah
- ♦ Diiwaangeli macluumaadka qofka macaamilka
- ♦ Diiwaangeli macluumaadka macaamilka ganacsi lacageed
- ♦ U dir macluumaad adeegyada (MSB) helayo macaamilka ganacsi lacagta.
- ♦ Xafid diiwaangelinta illaa shan sannadood laga soo billaabo taariikhdi la sameeyay macaamilka ganacsi lacageed.

#### Diiwaangelinta Iskubedelka Lacagaha

Qofka kasta oo beddelo lacagaha waa inuu sameeyaa hayaana diiwaangelinti iskubeddel waliba ee lacag ah oo ka badan \$1,000 doolar (Fiiri 31 CFR103.37). Iskubeddelada lacagta waxay noqon kartaa midda gudaha ama waddamada shisheeye, ama waxay noqon kartaa labadaba. Sidaa darteed, diiwaangelinta iskubeddelada lacagta waxaa loo baahan yahay marka:

- ♦ Lacagta soo gashay in ka badan \$1,000 doolar, ama
- ♦ Lacagta baxday in ka badan \$1,000 doolar.

**Tusaale:** Qof macaamil ah ayaa wuxuu doonayaa inuu beddesho \$3,000 doolar oo ku beddesho lacagta doolarka ee Kanada in u dhiganto doolarka Mareykanka, ama qof macaamil ah wuxuu rabaa inuu u beddesho \$1,500 doolar lacag xaashi ah oo \$20 doolar ah iyo \$1,500 doolar inuu u beddesho \$100 doolar oo xaashi ah.

Sikastaba ha noqoto, macaamilka ganacsi lacag waa in la diiwaangeliyaa.

**Waxyaabaha layskarabo diiwaangelinta iskubeddelka lacagta waxaa ku jira kuwo soo socda- iskubeddelka lacagta waa in la:**

- ♦ Diiwangeliyaa aqoonsiga qofka macaamilka iyo macluumaadkiisa
- ♦ Diwangeliyaa macluumaadka macaamilka ganacsiga lacagta
- ♦ Xafid diiwaangelinta illaa shan sannadood laga soo billaabo taariikhdi la sameeyay macaamil ganacsi lacageed.

## Warbixinnda oo Saacidayo Adeegyadda (MSBs) Inay Aqoonsadaan Macaamilada Ganacsi Lacageed ee Shakiga Ku Jiro.

Liiska Warbixinnda soo socda waxaa loo isticmaali karaa in lagu eego Adeegyada (MSB) oo laga yaabo inay ku jirto falalka lacagta la dhaqay.

#### Lacag Caddaan oo soo xarootay iyo Lacag Caddaan oo baxday ee Macaamil Ganacsi Lacag ee Baaxad Weyn.

Kuwo badan oo ah Adeegyada (MSB) waxay diyaariyaan, ama ay qabaan nidaamyo oo dhalinayo lacagta caddaan oo soo gashay iyo lacagta caddaan oo baxday. Inta badan, warbixinndaas waxaa ku jira macaamil ganacsi lacag oo dhaftay xadkii loogu talagalay.

Kuwo badan ee lacagta gudbiyo, tusaale ahaan, waxay qabaan aqoonsi la sugay oo ah inta laga rabay inta ka hooseysa xatka \$3,000 doolar oo logu talagalay. Warbixinndaasi waxay tari karaan in la aqoonsado qof macaamil ah oo laga yaabo inuu yahay mid ku qorshaynayo inuu ka dhuunto Waxkaqabatka Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA) warbixinteeda iyo diiwaangelinteeda oo layska rabo ama inay lug ay kula jiraan falal kale oo aan caadi ahayn.

#### Warbixinno Wax Gaar Ah Loogu Talagalay

Kuwa soo saara jeega socotada iyo jeega wareega iyo shirkadaha xawilaadda sameeya inta badan waxay diyaariyaan ama waxay qabaan nidaamyo dhalinaya warbixinno oo muujinayo macaamil ganacsilacag oo laga yaabo inay ku jirto wax si gaar ah loogu tala galay - Ku talagalku waa in laga dhigo ama in laga soo bixiyo jeegag xisaabo u dhxeeyo laba ama ka badan bangiyo iyo sababtaasi awgeed iyagoo laga faa'idsaysanayo sabbeynta -waa marka taasi waqtiga uu bangiga qaadanayo keydinta si loogu uruuriyo bangiga bixinayo warbixinnda. Warbixinnda oo muujinayo wax ugu tala gal ah waxaa laga yaabaa inay ku jirto kashifaad iyo nidaamyo falal oo aan caadi ahayn taasoo laga yaabo inay la xiriirto lacagta la dhaqay.

## Warbixinnda Lacagta Xawilaadda

Shirkadaha Sameeya Xaawaaladaha Lacagta waxay diyaarinayaan, ama ay qabaan nidaamyo oo dhalinayo maalin waliba macaamil ganacsilacageed iyo warbixinno kale oo muujinayo koox kale-duwan macaamil xawaalad oo ku shaqaynayo nidaamkooda dhexdiisa (Tusaale: Waregga warbixinnda waxay tusi dhammaan xawilaadaha oo ka timid dalka A ee ku socota dalka B muddo waqtiyo qayaxan. Warbixinndaasi waxay wax ka tari karaan nidaamyo oo aan caadi ahayn oo laga yaabo inay soo bandhigto lacagta la dhaqay.

Hadba sida ku xiran noqa warbixinta iyo soo noq-noqoshada, warbixinndaas waxay saacidi karaan inay muujiyaan habudhaqan aan caadi ahayn ee qofka macaamilka. Warbixinndaasi xittaa waxay saacidi karaan inay muujiyaan habudhaqan aan caadi ahayn ee adeega sameeya shaqo ganacsii sida wakiil shirkadaha wax xawilo.

## Alaab \$3,000 doolar "Diiwaan"

Warbixinnda gadidda alaaboyin lacageed inta u dhhexeyso \$3,000 doolar- \$10,000 doolar iskudarkood waxaa loo baahan yahay xeerarka Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA), taasoo wax tari karta Adeegyada (MSBs) iney u muujiso, inay jiri karto falal ama nidaam aan caadi ahayn. Diiwaangelinta macluumaaadka, waxay tusaale ahaan saacidi karaan aqoonsiga qofka macaamilka oo laga yaabo inuu yahay qof qorshanayo macaamil ganacsilacag oo doonayo inuu ka dhuunto Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA) warbixintooda iyo diiwaangelintooda loo baahan yahay.

## Safeeynta Xusuusyada /Rasiidyada

Kuwa soo saara jeega wareega iyo jeega socotada waxay diyaarinayaan ama ay qabaan nidaamyo oo dhalinayo diiwaangelin maalin walbo shayga la keenay in lagu bixiyo soo saaraha xisaabtiisa bangiga. Kuwo badan ee soosaarayaasha waxay jaangooyeen qorshooyin oo lagu aqoonsan karo nidaam aan caadi ahayn ee alaabaha la xaqiijiyay. Warbixinndaasi waxay noqon karaan kuwa si aad wax uga tara aqoonsi shayga oo laga yaabo in loo isticmaalayo ujeeddo aan sharci ahayn.

## Qoraalka Diiwaangelinta Xawaaladda ee \$3,000 doolar.

Diiwaangelintani, oo u baahan xeerarka Waxkaqabatka Layskarabo Sirqarinta Bangiga waxay saacidi kartaa kuwo sameeya xawilaadda inay ka aqoonsadan inay ka jiri karto qorsho nidaamsan. Diiwaangelintaas ee \$3,000 doolar ama ka badan ee xawilaadda iyadoo loo tixgelin qaabka lagu bixiyey waxay saacidi kartaa aqoonsiga dadka macaamilada oo laga yaabo inay qorsheeynayaan macaamilo ganacsilacag oo ay rabaan inay ka dhuuntaan warbixinnda iyo diiwaangelinta ee u bahan Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA)

## Warbixinnda Falalka Qofka Macaamilka

Qaar ka mid ah adeegyada sameeyo shaqo ganacsilacageed (MSB) waxay isticmaalaan qorsho abalgud macaamil si ay u dhiirigeliyaan inuu macaamilka ay soo noq-noqdaan. Waxbixinta waxay dhalinaysaa in la ilaaliyo shaqsiga macaamilka jawaabtiisa ama macaamilka guud ahaan falalkiisa, taasoo u noqon karta wax tar weyn si loo aqoonsado macaamilo ganacsilacag aan caadi ahayn ama qorsho nidaamsan ee macaamil ganacsilacageed.

## Nidaamyo Iskudubbaridan Qaarkood

Sifoyinka soo socda waxaa loola jeeda in lagu saacido Adeegyada (MSB) inay aqoonsadaan falalka

dambiiliayaasha ay u isticmaalaan lacagta la dhaqay. Waxaa xittaa loola jeedaa in la sii xoojiyo dadaalka weyn oo lagu adkeynayo qorshaha aqoonsiga ee qofka macaamilka. Ugu dambeystii, walow tusaalooyinkaasi ay yihiin calaamo baaritaanno ee ugu horreeyn lug ku leh bangiyada, kuwaasoo siinayo duruus inay bartaan Adeegyada (MSB).

## Howfulinta Daboolka Labada Dacal

Laba bangi ayaa waxay bixiyeen warbixin falal shaki ku jira ee la xiriira isbeddel howfulin ee dad macaamil ah.

Labadaas warbixinno iyo baaritaanka warbixinta ee Macaamil Ganacsi Lacageed (CTR) ee dhinaca US Adeegyada Canshuurbixinta waxay saacidi inay isu keento baaritaan xeer qaran.

Qof shaqaale ah ayaa wuxuu ku arkay hal bangi, qof macaamil dallaal ee alaaboo qaalii ah ee dumarka isku qurxiyo, oo dhiganaya lacag caddaan ah oo badan (\$25 maliyan muddo 3 bilood ah) taasoo ahayn mid u qalanta haddii loo fiiryo shaqadiisa ganacsiga ee caadiga. Taasoo u dheer in loo fayl-gareeyo Warbixinta Macaamil Ganacsi Lacageed (CTR) dhinaca macaamilka wixii ka badan \$10,000 doolar isla hal maalin ganacsi gudaheed, hal bangi wuxuu u wargelinaya IRS (Adeegyada Uruurinta Daqliga Gudaha) iyo CID (Qaybta Baaritaanka Dambiyada ).

Bangi kale, shaqaale oo fiiro dheer leh wuxuu ka shakiyey qof macaamil ah oo qabo dukaan cunto iyo adeegyo jeega lagu sarrifto lacagta caddaanka ah, wuxuu joojiyay inuu u qaato lacag caddaan ah jeegagii uu dhigay bangiga. Beddelaadan bangiga waxay tusaysa inuu wargeliyo saraakiisha fulinta sharciga.

Isugayn labadaan bangiyo shakigooda wuxuu saacidi in la ogaado lana carqaladeeyo howfulin oo keeni lahayd lacag la dhaqay illaa \$1,2 baliyan muddo laba sano ah. In kabadan 127 qof ayaa la xiray, bangi shisheeyana waa la eedeyay, ee dambi ayaa lagu soo oogay iyo hal tan oo muqaadaraad ee kokaiin ah ayaa la qabtay waxaana ka soo baxday tiro dad badan ee dambi lagu xukumay.

## Howfulin C- Eryasho

Bangi ku yaala Luxemborg, laba laamiihsa ah, sagaal sarkaal ee bangiga iyo 75 shakhxiyood ee dallaal kale duwan ayaa la soo eedeyey oo suurto gal ahayd inay ku lug leeyhin nidaam qorsheyn ee calaami ah ee lacagta la dhaqay. Eedeyn dembi ee dad tiro badan ayaa arrintan ka soo baxda. Howfulinta wuxuu ku shaqeynayay ujeedo ah lacagta la dhaqay iyadoo laga soo qaadayo lacag caddaan ah oo ka timid falal ka timid daroogo lana keenayo magaaloojin ku yaalo Mareykanka, sidoo kale hantida waxaa lagu soo qaadayay lacag caddaan ah taasoo la dhigayo xisaabo qarsoodi ah ee ku yaalo bangiyada Mareykanka

Dadka ururrada isku xiran waxay sixiixayaan jeeg iska cad oo laga soo qaadayo xisaabta qarsoodiga, iyo marka ay dhacdo in lacagta la soo qaado, qofka madaxda ka ah howfulinta lacagta la dhaqay wuxuu ku galayaa tiradaasi jeeg iska cad wuxuna u dirayaan qofka iska leh raasumaalka ama wuxuu u gadaa lacagta sarrifka suuqa madoow.

Marka ay howfulinta fidsanto, madaxa howfulinta wuxuu sameynayaa kala wareejin kala duwanee howsha socota. Qaar raasumaalka ah ee xisaabaha qarsoon waxaa loo gudbinayaa xisaab qarsoodi noocy la mid ah ee Ameerikada Dhexeci si loo qariyo meesha asalkeedii hore ay lacagta ka timid, kuwa kalena waxaa loo gudbinayaa bangiyo kale ee ku yaala Mareykanka oo u sii gudbinayo bangiyo kale ee shisheeye .

Labada marbo, raasumaalada loo xawilay bangiyo shisheye, waxaa la hakiyay 90 maalmood ee qirid hubaal ah ee dhigista iyo waxaa loo isticmaalay sida damaanad deeyn oo sameeyey Bangiga Ameerikada Dhexeci oo sameeyey kooxdiisa. Howfulinta deynta waa la sii wadaya, haddana waxaa la dhigayaa xisaabo qarsoon ee bangiga horayna loogu gudbinayaa jidakkii hore loo soo maray.

Muddo kaddib, raasumaalkii oo loo soo gudbiyey labada bangi shisheeye waxaa lagu gataay qirid hubaal ah oo la dhigay bangi shisheeye kale. Qiradda hubaalka waxaa loogu isticmaalayaa rahmaad dayn oo sameynaya bangi saddexaad ee shisheeye ah, howshaasi oo dib loo soo gudbinayaa xisaabaha qarsoon ee bangiyada ee Mareykanka haddana laga xawilayo Mareykanka iyadoo loo xawilayo qofka xisaabta ku leh Koofurta Ameerika. Dadka isku dubarida wareegani waxay ahaayeen taxadir inay u digaan ka soo qaygalayaasha in macaamiladan lacagta in lagu maamuli karo isku dardar kala duwan si looga hortago tusmo lagu deydo. Iyaga waxay isticmaaleen shaqo ganacsi sida hoteelo iyo maqaayado cunto, sida asalka hantida waxaa loo xawilaa xisaabo qarsoon. Isugeynta, nidaamka hawleed wuxuu awood u yeeshay inuuu qariyo \$10 million bishiiba shaqada ganacsi ee daroogada.

## Bangiyada Amaahda iyo Ganacsiga ee Calamiga (BCCI)

Bangiyada Amaahda iyo Ganacsiga ee Caalamiga waxaa la aasaasay sannadii 1970kii, wuxuuna ku soo baxay inuu yahay bangiga ugu weyn ee adduunka ee hay'ado maaliyed ee lahaansho gaar ah, kaasoo leh howfulin wax ka badan illaa 70 dal. Muddadii socotay howfulinta bangiga, shaqaalaha bangiga waxaa laga helay inay lug ku lahaayeen falal badan ee sharci darro ah, taasoo ay ku jirto lacagta la dhaqay. Bangiga Amaahda iyo Ganacsiga ee Caalamiga wuxuu ku dhacay ciriri maaliyadeed sannadkii 1970, sababtoo ah inuu bixiyey deymo dhibaato la xiriira, laakinse iyagoo isticmaalay howl kale ee wax kala wareejin maaliyadeed oo kхиyaamo ku jirto, wuxuu istajiyay raasumaalka iyo masuuliyadda dadka bangiga kabo, iyagoo isku muujinayo inay yihiin hay'ado maaliyed oo si fiican u habeysan .

Baaraitaannadii 1991 waxay keentay in Bangiga (BCCI) howfulintisa inay la wareegaan guddiyada nidaamraaca ee toddoba dal. Bangiga (BCCI) waxay gaareen caaradda ugu sarreysa ee arrimo muhiim ah oo uu sameeyo hay'ado maaliyadeed: hay'adaha maaliyadeed waa inay ka ahaadaan taxadir inay wax ka ogaadaan hay; adaha kale ee maaliyadeed oo ay la leeyihin macaamil ganaci. Iyagu, waa inay si fiican u baaraan kuwo ugu waaweyn oo wax ku leh bangiga ama kuwo saamiyaasha wax ku leh inay si fiican u eegaan tayada iyo kormeerkaa ee bangiyada shisheeye ka helayaan waddamadooda, iyo inay ka foojignaadaan raasumaalka aan sharciga ahayn oo hayadaha oo halis gelinayo si ay ku sameeyan raasumaal, taasoo ku jirto xisaabaha bangiga iyo alaabaha ku fadhiyo qimo lacag iyo xawilaadaha lacagta kuwo taagan ama kuwo lala wareegay.

## Howfulinta Barafka Cagaaran.

Wakilaha Fulinta Sharciga ee siddeed waddamo waxay u wada shaqeynayaan waabit howl fulin ahi; taasoo keentay xarig 167 qof iyo in gacanta lagu dhigo lacag caddaan ah ee \$54 malyan ee doolar iyo raasumaalo kale. Howfulinta Barafka Cagaaran wuxuu horseeday xarig dad badan oo ka hayay jagooyin sare hayado maaliyed ayagoo lug kula lahaa madaxda Kokainka iyo ugu dambeystiina la xukumay. Xisaabooyin bangiyo badan ee adduunka ayaa la xayiray kaddib marka la helay xawilaado iyo keydsi badan ee la xiriira lacagta la dhaqay. Dalka Mareykanka waxaa la xayiray xisaabo bangi lalana wareegay magaalooinka San Diego, Los Angeles, Chicago, Houston, Miami iyo New York.

Bangiyada Mareykanka oo la dhigay kaydsi lacag caddaan ah oo la xiriira arrintani, waxay wada shaqeeyen wakiilada Wakaaladaha Fulinta La Dagaalanka Daroogada iyo waxayna wadeen inay u fayl-gareeyaan Warbixinta Macaamil Ganaci Lacageed (CTR) taasoo siisay dalil dheeraad ah. Bankiyada dhedhexaadka wax yar ayeey ka ogaan karaan macaamilka iyo halka khatarta ay u badan tahay in lagu isticmaalo qayb ka mid tahay xiriirada lacagta la dhaqay.

## Sharci Dejin

Sannado badan ayaa Koongreeska wuxuu ansixiyay sharcyo badan oo lagula dagaallamayo lacagta la dhaqay. Waxaa laga yaabaa in tan ugu muhiimsan ee sharciyadaasi ay tahay Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga(BSA) ee 1970, Kontoroolka Lacagta La Dhaqay ee 1986, Dhabargoynta Waxkaqabatka Xadgudubka Daroogada ee 1988, Annunzio-Wylie Waxkaqabatka ee 1992, Cadaadiska Waxkaqabatka Lacagta La Dhaqay ee 1994, Xeeladda Faldambiyeedka Maaliyadda ee Lacagta La Dhaqay ee 1998 iyo USA PATRIOT Act- Waxkaqabatka ee 2001.

Waxkaqabatka Layska rabo Sirqarinta Bangiga ee 1970 (P.L.91-508) waxaa loogu tala galay:

- ♦ Ku hortagidda in lala baxsado iyo in la sugo adeegyada lagula dagaallamo dambiyada habeysan.
- ♦ In la abuuro warqado raad-raac ah oo lagu baaro warbixinta macaamilka lacagta tiradeeda badan tahay ayadoo la sameeynayo warbixinnaa joogtada iyo kuwo loo baahan yahay ( Tusaale, Warbixinta Macaamilka Lacageed oo layskarabo-CTR)
- ♦ Hubi aqoonsiga macaamilka ee xafid xususyo muhiim qaarkood ee macaamika lacagta ee qofka macaamilka ah, taasoo ay ku jirto jeegaga la tirtiray iyo deemaha, kaararka la saxiixay iyo bayaanka xisaabta.
- ♦ Ku waajibin dembi madani iyo ciqaabaha dembiile ajligeeda hoggaansanaan la'aanta warbixinta loo baahan yahay.
- ♦ In la hagaajiyo ogaanshaha iyo baaraanka dembiga canshuuraha iyo nidaamka lagu dhaqo xadgudabyada.

Kontoroolka Waxqaabatka Lacagta La Qabtay 1986 (P.L.99-570), qayb ka mid ah xadgudabka waxqaabashada la dagaallanka daroogada ee 1986, waxay ka dhigay lacagta la dhaqay dembi federal ah. Waxay abuuray saddex gef dambivo ee la xiriira falalka lacagta la dhaqay oo ay soo dhexmartay ama sameeyeen hay'ad maaliyadeed.

Gefafkaasi waa:

- ♦ Adoo og inaad saacidid lacagta la dhaqay oo ka soo jeeda falal dembiyeed.
- ♦ Adoo og (ayna ku jirto iska idhatir ee ula kac ah) inaad lug ku leedahay.
- ♦ Macaamil lacag oo ka badan \$10,000 doolar ee la xiriira lahaansho hanti ee ka soo jeeda falal dambi.
- ♦ Hab dhismo macaamilo lacag oo la rabo in lagala baxsado Warbixinta Waxqabta Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA) oo loo baahan yahay in la sameeyo.

The Xadgudabka Waxkaqabatka ee ladagaallanka daroogada ee 1988 (P.L. 100-690) waxay xoojisay dadaalka dhabargoynta lacagta la dhaqay siyaabo badan.

Waxkaqabashada:

- ♦ Waxay si micno wayn kor ugu qaaday ciqaabta madaniga iyo dambilaha ee lacagta la dhaqay iyo xadgudabiyo kale ee Waxkaqabtka Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA), oo ay ku jirto lahaansho aan sharci ahayn, dhab ama shahsii oo la xiriira macaamil lacag ama isku deyid macaamil lacag iyadoo lagu xadgudbayo sharchiyada la xiriira fayl-gareynta Warbixinna Macaamilka Ganacsi Lacaageed,
- ♦ lacagta la dhaqay ama hab loo dhisay macaamil ganacsi lacag.
- ♦ In la sameeyo hubin aqoonsi adag iyo xusuus qorid ee lacagta caddaanka ah ee wax lagu gatay alaaboo lacageed oo ay ku jirto jeega wareega, jeega socotada inta u dhexeyso \$3,000 doolar iyo \$10,000 doolar iskudarkooda.
- ♦ Ruqsad qaybta hantidhowrka oo looga baahan yahay hay'ado qaarkood ee jograafi qayaxan ama "bartilmaameed" niwaaxi leh inay fayl-gareeyan Warbixin dheeraad Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA) warbixinno macaamilo lacag oo ka yar \$10,000 doolar ee dhanka "Joqaraafi Bartilmaamo Iskuxigo"
- ♦ Inay ku toosiyaan Waaxda Hantidhowrka inay la gasho wadaxajood heshiishyo labageesood ee caalami ah taasoo daboolleysa diiwaangelinta macaamil ganacsi lacag ee tiro badan ee lacagta Mareykanka iyo in la wadaago maclumaadka.
- ♦ In la kordhiyo cunaqabatayn - ciqaab ee la xiriira baxsashada canshuurta marka ay lacagta ka soo jeedo falal dambi.

Waxkaqabashada Annunzio-Wylie ee Dhabargoynta Lacagta La Dhaqay ee 1992 ( P.L. 102-55-) wuxu xoojiyay ciqaabah hayadaha maaliyadeed oo lagu helo fal dambi ee la xiriira lacagta la dhaqay. Annunzio-Wylie waxay warsanayaan Xoghayaha Hantidhowrka Dawladda inuu:

- ♦ Hirgeleyo qaunuun weydiisanayo geddigood hay'adaha maaliyeed labadaba bangiyada iyo kuwo aan bangiyada ahay (ee u jirto Adeegyada Sameeyo Shaqo Ganacsi Lacageed, MSB) inay hayaan xusuus diiwaangelin hantida la xawilayo waddanka gudihiisa iyo dibbadaba, taasoo ay isticmaali karaan fulinta sharciga baaritaannadooda.
- ♦ In la aasaaso Koox la Taliyaal ah ee Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSAAG) oo iskudhafan dad matalayo Waaxda Hantidhowrka Dawladda iyo Waaxda Caddaaladda, Xafiiska Qaranka Barnaamijka, Kontoroolka Daroogada iyo Dadyow kale ee daneeynayo iyo hay'ado la xiriira maaliyadda oo ay ku jirto Adeegyada Sameeyo Shaqo Ganacsi Lacageed (MSBs).

Waxkabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga iyo la Taliyayaasha ( BSAAG), oo la aasaasay 1994, waxay kulmaan laba jeer sannad walba, waxayna wargelinayaan dadka matalayo adeegyada shariikadaha ku hawlan maaliyadda arrimo la xiriiro nidaamyo cususb ee soo kordhay iyo sida loo isticmaalayo bixinta warbixinta ee maclumaadka.

Annunzio-Wyle waxay oggolaatay in Xoghayaha Hantidhowrka Dawladda in:

- ♦ La weydiyo hay'ad maaliyadeed waliba ama shaqaale hay'ad maaliyadeed waliba inay soo warbixiyaan macaamil ganacsi lacag oo shaki ku jira oo laga yaabo inay suurto gal tahay in lagu xadgudbay xeeraka sharciga.
- ♦ La weydiyo hay'ad maaliyadeed waliba inay hirgeliso qorshaha dhabargooynata ee lacagta la dhaqay.

Waxaa sii dheer, Annunzio-Wyle:

- ♦ Waxay uga dhigi sharci darro hay'adda maaliyadda ama shaqaalaha hay'adda maaliyadda inay u sheegaan qofkasta oo ku lug leh macaamil ganacsi lacag oo shaki ku jira marka Falalka Shakiga Ku Jira (SAR) la fayl-gareeyey.
- ♦ In la difaaco hay'ad maaliyad kasto iyo maamule kasto, sarkaal shaqaalaha ama wakiilka hay'adda maaliyadda, masuuliyad madani marka uu soo bixiyo warbixin falal shaki ku jiro.
- ♦ Ka dhig dambi federal ah in la sameeyo gudbin ganacsi lacag oo sharci darro ah (Tusaale, sameeyen gudbin ganacsi lacag adigoo aan ka haysan shati oo ay tahay sharci dawladda inaad ka haysatid shatigaasi)

The Jabinta Waxkaqabashada Lacagta La Dhaqay (MLSA) ee 1994 (P.L. 103-325) oo gaar ahaaneed loo soo jeediyay adeegyada (MSBs). Jabinta Waxkaqabashada Lacagta La Dhaqay (MLSA):

Waxaa la weydiinayaad Adeegya waliba inuu is diiwaangeliyo qofka leh ama qofka kontaroolayaa adeegyada.

- ♦ Waxaa la weydiinayaad inay hayaan liiska shaqo ganacsiyada oo sharchiyeeyas inay u dhaqmaan sida wakiilada oo ku xiran hay'adaha adeegyada oo bixiya adeegyada (MSB).
- ♦ Waxay noqneysaa dambi federal ah haddii ay sameeyaan adeegyo howlfulin aan la diiwaangelin.
- ♦ Ku talin dawladaha inay hirgeliyaan sharci isku wada mid ah oo lagu isticmaali karo adeegyada (MSB).

Waxkaqabatka iyo Xeeladda Dambiga La Xiriira Maaliyadda ee 1998 (P.L. 105-310) wuxuu u baahan yahay:

- ♦ Madaxweynaha, isagoo u sii marayo Xoghayaha Hantidhowrka iyo Xiriininta Xeerilaaliyaha Guud in la hormariyo xeelo qaran oo lagula dagaallamo lacagta la dhaqayo iyo dambiga maaliyadda la xiriira iyo in loo soo bandhigo Koongareeska bil waliba ee 1da Febraayo.
- ♦ Xoghayaha Hantidhowrka Dawladda isagoo la talawadaagayo Xeerilaaliyaha Guud inay xadiddaan nawaaxiyo qaarkood ee jograafi ah, warshado, qayb ama hay'ado oo u noqon kara beylo ee lacagta la dhaqay oo ka soo jeeda falal dambi ee maaliyadadeed. (Nawaaxiyo qaarkood waxaa loo naqshadeeyey inay yihiin Nawaaxiga Ugu Sarreysa Uguna Badan Falal Dambi ee La Xiriira Maaliyadda).

USA PATRIOT Act ee 2001 (P.L. 107-56) oo ah Iskuxernaasho iyo Xoojin Mareykanka taasoo siinaysa adeegyo oo ku haboon in lagu qabto iyo in lagu carqaladeeyo Waxkaqabatka Argagaxisada, wuxuu u baahan yahay:

- ♦ Hay'adaha Maaliyeed waa inay lahaadaan barnamij la dagaallanka lacagta la dhaqay. Barnamij waliba waa inuu ugu yaraan lahaadaa qorsho, howlfulin iyo kontarool; in la magacaabo sarkaal u caddecsan fulinta howsha, tababar iyo madaxabannaan xisaab hubin shaqeynaysa.
- ♦ Sameyn nidaam isgaarsiin oo sir ah oo ka dhexeysa dowladda iyo shirkadaha sameeyo adeegyada maaliyadadeed.
- ♦ Waxkaqabashada howlfulinta aqoonsiga qofka macaamilka ee xisabta cusub.
- ♦ Howlkarnimo waajib dheerad ah ee isgaarsiinta iyo xisaabaha bangiga qaaska ah oo leh dad aan ahayn MareykankaMareykanka
- ♦ Sameyn nabab ilaalin nidaam isku xiran ee aad u surreyo ee wax lagaga qabanayo Faldambiyeedka La Xiriira Maaliyadda
- ♦ Inay sameyso FinCEN nabab ilaalin aad u adag loogu tala galay fayl-gareynta warbixinnada la siinayoWaxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA).

## Dadaalka Caalamiga ah ee Lacagta La Dhaqay

Mareykanka ma aha keliya cidda la dagaalamaysa faldambiyeedka maaliyadda. Waddamo badan waxay ansaxiyeen sharcayo micno leh ee la xiriira la dagaallanka lacagta la dhaqay. Tiro badan ee ururro ee caalami ah iyo kooxiyo dalal badan waxay hirgeliyeen qaunuun badan iyo xeerar lagu dagaallamayo lacagta la dhaqay.

### Guddiga Basel

Guddiga Basel wuxuu iskugu jira dad matalayo bangiga dhexe iyo awoodda kormeerka Belgium, Kanada, Faraans, Jarmalka , Itaaliya, Jabaan, Lussemburg, waddamada Natharland, Sbain, Iswiidhan, Ingiriiska iyo Mareykanka. Sannadki 1988, Guddiga Basel wuxuu soo saaray " Bayaan Mabaadi" ee la xiriira lacagta la dhaqay, oo guud ahaan ku talinayso in laga helo macaamilka aqoonsi habboon iyo hoggaansanaanta sharciyada iyo xeerkarka lagu dabakhayo macaamilada la xiriira maaliyadda.

### Jamciyadda Qaaruumaha (UN)

Shirweynaha Jamciyadda Qaaruumaha ee Lid Ku Ah Ganacsiga Sharcidarrada ee Daroogada Narkootigada iyo himirdooriyayaasha (Shirweynaha Vienna ) waxay ka dalbani saxiixayaasha inay ka dhigaan dembi dhaqidda lacagta, in la hubiyo Sirqarinta Bangiga in aysan noqon darbi aan laga gudbi karin si loo fuliyo baaritaanka dembiyada, iyo in la xoojiyo in laga saaro xaydhaabka sharci dejinta baaritaannada, dembi ku oogid iyo wadashaqaynta caalamiga.

### Xogga Waxkaqabatka Howlwadajireedka Maaliyadda (FAFT)

Xogga Waxkaqabatka Howlwaajireedka Maaliyadda (FAFT) waxaa lagu abaabulay Kulan Dhaqaale, 1989, ee waddamamada warshadaha badankood. Waxaa laga soo saaray warbixin bixinayo 40 talooyin, oo xoojinaysa shirweynihii Vienna, taasoo ah sidii loo fulinlahaa iyo siddi loo hirgelin lahaa sharciga lacagta la dhaqay waddamada xubnaha ka ah dhexdooda. Isaga waxay kaloo sameeyeen qaunuunka iyo xeerarka dhaqidda lacagta ay aasaaseen Caribbean Xogga Waxqabatka Howlwadajereedka Maaliyadeed iyo Ururka Dowlaadaaha Mareykanka.

Warbixin Kale ee (FAFT) soo saartay ku saabsan wadammada aan ka dhaxeynin wadashaqeynta iyo gobollada loo aqoonsaday inay go'aansadeen qaanuno iyo inaysan ku shaqeyn iyo iney carqaladeeyan wadashaqeynta caalamiga oo lagu dhabargoynayo lacagta la dhaqay.

#### Midowga Yurub

Sannadkii 1991, Midowga Yurub waxay ka soo saareen amarro rasmi ah dhaqitaanka lacagaha taasoo u dhiganta asliga 40 talooyin ee FAFT. Waxay weydiisanyaan warbixin qasab ah ee la xiriira macaamilada ganacsi lacag oo shaki ku jira iyo aqoonsiga. Taasoo wax tar u ah milkiilaha iyo macaamilayaasha ee macaamilka ganacsi ee lacageed iyo xisaabaha.

#### Kooxda Egmont

Bartamaha ugu muuhimsan Kooxda Ururuka Sirdoonta Maaliyed (FIUs) oo loo yaqaan Kooxda Egmont-waxay isku imaadeen inay u helaan jihoo wadashaqayn ah, gaar ahaan xagga isdhafsiya macluumaadka, wadqaqabsi xirfadood, iyo inay gacan isku siyyaan wixii ugu dambeeyey Kooxda Ururuka Sirdoonta Maaliyadda (FIUs). Waxaa laga yaabaa in mudda waxtarka micno ugu weyn ee Kooxda Egmont inay tahay curinta shabakada badbaadsan ee Internetka. Egmond International Secure Web System- oo intooda badan kobcisay Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Faldambiyeedka la Xiriira Maaaliyadda (FinCEN) oo u ogolaaneeyso xubnaha guddiga Egmond inay isla xiriiraan dhexdooda iyagoo isu marinayo wararka eemail oo la hubo, iyo in la soo saaro lana helo macluumaadka Kooxda Ururuka Sirdoonta Maaliyadda (FIU), isbedbedelka lacagta la dhaqay ,baaritaannada adeegyada maaliyadda iyo horumarinta la xiriira cilmiga farsamada iyo wax - soo saarka.

Mudda ugu muhiimsan ee (FinCEN) waxay ahayd inay awood u yeelatay inay soo saarto adeegyo oo ay ku taageereeyso baaritaannada federalka iyadoo ka soo uruurinayso macluumaad kuwa la jaalka ah ee Kooxda Ururuka Sirdoonta Maaliyadda (FIU) ee caalamka. Macluumaadkaan oo lagu heli Kara kelia si dhib ah ama aan lagu heli karin si kale.

Ka qaybgalinta nidaamkan howleed ee caalamka oo dhan waxay u oggolaan ee awood u siin FinCEN inay gargaarto dowladaha iyo wakaaladahooda fulinta sharciga inay siyyaan macluumadka ugu muhiimsan ee la dagaallanka lacagta la dhaqay oo ay u baahan yihiin sida ay u fulin lahayeen baaritaankooda.

## Waddamada Talawadaagta iyo Dhaqaale iyo Liisaska Cunaqabateynka Ganacsiga

#### Tala wadaagta ee FinCEN bixiisay

Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Faldambiyeedka La Xiriira Maaliyadda (FinCEN) waxay soo saartay waddamo talowadaag ah iyadoo ku boorineyso baaris xeel dheer macaamilada maaliyadeed ee waddamada u qaba kontrool yar dhabargoynta lacagta la dhaqay, talowadaagta waxaa laga daawan karaa [www.fincen.gov](http://www.fincen.gov) xaga hoose ee faaxfaaxinta talawadaagta.

#### Liiska Xafiiska Kontaroolka Maalingelinta Dibadda (OFAC)

Qaybta Hantidhowrka ee Dowlaada Mareykanka ee OFAC wuxuu soo saaray liis gaar u ah qaraamada iyo kuwa la cunnoqabateeyey ( SDNlist ). Xeerarka OFAC wuxuu uga baahan yahay shaqooyinka ganacsi inay aqoonsadaan oo ayna joojiyaan raasumaalada wadamada bartilmamsan, argagaxisada, madaxda daroogada iyo kuwo kale ee si gaar loo magacaabay. Liisaskani iyo tilmaamo qayaxan eek u saabsan nooca shaqada ganacsi ahaan karo ama aan ahaan karin kuwa lagula isticmaalo, xeerarka OFAC, tixraac shabakada website (OFAC) [www.ustreas.gov/ofac](http://www.ustreas.gov/ofac).

## Qaamuus

#### Wakiil

Shaq Ganacsi oo soo saaraha amro, isagoo heshiis qoraal ah ama si kale, inuu iska gado alaaboo ama arrin la xiriirta gudbin lacag iyo inuu gadayo ama inuu helayo adeegyada xawilaada.

### **Isugeyin**

Isugeyn macaamilo lacag ee badan oo ay adeegyada (MSB) ogyihin in uu qof macaamil sameyey ama qof isla isaga matalayo isla maalin gudaheed ee loogu talagalay Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA) in la siiyo warbixin iyo in la diiwaangeliyo. Tusaale, adeegyada (MSB) waa inay u fayl-gareeyaan Warbixinta Macaamil Ganacsi Lacageed (CTR) haddii ay ogyihin in qofka macaamilka ah isku daray lacag soo gashay iyo midda baxday macaamil lacag ee hal maalin gudaheed isugeynteeda tahay in ka badan \$10,000 doolar.

### **Laan**

Milkilaha meesha midkood ha ahaado soo saaraha ama wakiil adeegyo maaliyad lagu gatay.

### **Soo Saaraha**

Shaqada ganacsi ee ugu dambeyntii ka ah mas'ul bixidda jeega wareega ama jeega socotada sida soo qaadashada alaabahaas ama gudbin lacag taasoo waajib ku ah inuu siiyo damaanad bixitaanka xawaaladda lacagta.

### **Dhaqidda Lacagta**

Howfulinta oo ay doonayaan dambiliayaasha inay ka dhuuntaan ilaha runta ah ee ka soo jeeda lacagtooda ama ka timid fal dambi, waxay ku lug leeyihiin saddex kala duwan. Iyo mararka qaarkood heerar isdhameystiraya:

**Ku Meelayn** — Muqaal ka dhigid howfulinta dambiliaha nidaamka maaliyadda dhexdiisa.

**Sal u Yeeelid** — Kala saaridda howfulinta falalka dambiliaha ee aasaaskoodi hore iyagoo ku saleeynayo macaamil maaliyed.

**Isdhexgelin** — Ku dxaxdhaqaajinta howfulinta dembiga hab ugu dambeyntii siinayo inay ka muuqato micneyn sharci ah ee lacagta lagu helay sharcidarrada.

Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed (MSB) Qof kasta oo sameynayo shaqo ganacsi ha ahaado si caadi ah ama si shaqo ganacsi isku uruursan oo siinayo hal wax ka badan adeegyada soo socda:

- ♦ Jeegaga Wareega
- ♦ Jeegaga Socotada
- ♦ Jeegaga la sarriito
- ♦ Ganacsi lacag ama isku beddelid lacag
- ♦ Qiimaha Keeydsan

-IYO-

- ♦ In lagu sameeyey in ka badan \$1,000 doolar adeegyo shaqo ganacsi lacageed
  - Oo sameeyey hal qof
  - Hal ama ka badan macaamilo lacag ( howfulin hal mar ah)
  - Maalintay ahaataba

-AMA-

- ♦ Wuxuu siinaya xaawaalad lacag ee tiro kasta ah.

### **Lacag Gudbin**

Qof ku mashquulsaan shaqo ganacsi xawilaad isagoo u maraya hay'ad maaliyad waa Gudbiye lacag iyo Adeegyada (MBS), iyadoo la tixgelinaynin macaamilka tirada xawaaladda. Guud ahaan, helitaanka iyo diritaanka lacagta oo ah qayb lagama maarmaan ee macamilka lacagta aan ka ahayn lacagta la gudbiyey nafteeda (Tusaale ahaan, ayadoo la xiriirta caymisyada ama milkiyad kale) uma noqon karto sabab qofka inuu noqdo lacag gudbiye.

### **Dibugate**

Shaqo ganacsi oo oggolaanayo inuu qaaato alaaboo lagu beddelayo lacag ama alaaboojin kale oo aan ahayn soo saaraha waa dibugate. Tusaale ahaan: Hoteel oo siinayo qofka macaamilka \$1,500 doolar oo caddan ah isagoo kaga sarifanayo \$1,500 doolar oo jeega wareega ah (oo soo saaray adeeg MSB kale) waxaa lagu magacaabaa dibugate. Micnaha Adeegyada Sameeya Shaqo Ganacsi Lacageed (MSB) ee 31 CFR 103.11(u) (4) waxay quseynaysaa dibugate ee jeega wareega iyo jeega socotada keliya haddii ay alaaboojinka lug ku leh lagu gadanayo qiimo lacag ah - taasi waa lacag, ama lacageyn ama kuwo kale ee lagu doorsankaro ama alaaboojin kale. Dhanka xeerarka Waxkaqabashada Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA). Qaadashada alaabaha ee lagu beddeshay badeeco ama adeegyo guud ma aha dibugadasho.

### **Habdhismo**

Eray loo isticmaalay tixraacidda fal waliba ee la xiriirta in lala baxsado warbixinta ama diiwaangelinta markay gaarto xadka, iyo warbixin iyo diiwaangelin oo waafaqsan Waxkaqabashada Layskarabo

Sirqarinta Bangiga (BSA). (Tusaale: \$1,000 doolar oo lacag laysku beddelay iyo \$3,000 doolar oo diwaangelin lacag xawaalad ah ama in ka badan \$10,000 doolar ee lacag marka la faylgareeyo Macaamil Ganacsi Lacageed (CTR). Habdhismo waa dembi federaal ah.

#### Tusaale Habdhismo

1. Hal qof ayaa wuxuu u kala jibinaya macaamil lacag oo weyn labo ama wax ka yar-yar ee macaaamilo ah. —

Qofka macaamilka ah wuxuu rajeynayaa inuu xawilo \$10,500 doolar oo caddan ah inuu xawilo hal maalin gudaaheed. Hase ahatee, isagoo og inta ugu yar ee lagu fayl-gareynayo Warbixinta Macaamilka Ganacsi Lacageed (CTR) (In ka badan \$10,000 doolar xawilaad lacag caddaan ah) uu gaaray, wuxuu sameeynayaa labo xawilaad oo \$5,250 doolar lacag caddaan ah, taasoo uu doonayo inuu ka dhuunto Warbixinta Macaamilka Ganacsi Lacageed.

2. Macaamil lacag oo weyn ayaa loo kala jebiyay laba ama kuwa yar-yar xawilaado oo sameeyey qof ama dad badan. —

Qof macaamil ah wuxuu rabaa inuu u diro \$10,000 doolar saaxiibkiisa oo jooga London. Macaamilka iyo sadeex qof ee kale qofkiiba wuxuu gadanayaa \$2,500 doolar xawilaad lacag ee London loo dirayo, sidaa darteed waxaa lagala baxsanayaa Lacagta Xawilaadda Qaunuunka Diwaangelinta ee ugu yaraan loo baahan yahay \$3,000 doolar.

## Codsasho Macluumaad Badan

### Foomamka Waxkaqabashada Layska Rabo Sirqarinta Bangiga (BSA).

Guuris (Download):

FinCEN website waa: [www.fincen.gov](http://www.fincen.gov)

MSB website waa: [http://www.fincen.gov/financial\\_institutions/msb/](http://www.fincen.gov/financial_institutions/msb/)

IRS website waa: [www.irs.gov](http://www.irs.gov)

Ka Dalbo:

Foomamka IRS Distribuition Center

1-800-829-3676

### Macluumaad iyo Waxyabaha Ku Siinayo Tilmaamo oo Bilaash ah Ka Dalbo:

Ka Dalbo:

MSB /website: [http://www.fincen.gov/financial\\_institutions/msb/](http://www.fincen.gov/financial_institutions/msb/)

Money Services Business Outreach Office at:

1-800-386-6329

### Jawaabaha ee Su'aalaha ku Saabsan Fayl-gareynta Foomamka Waxkaqabatka Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA).

IRS-Detroit Computing Center

Hotline

1-800-800-2877

### Fasiraadda Xeerarka ee Waxkaqabatka Layskarabo Sirqarinta Bangiga (BSA)

Fulinta Nidaamyada Lagaga Hortagayo Falalka Dambiyeed ee la XiriiraMaaliyadda (Financial Crimes Enforcement Network) 1-800-949-2732

### Warbixi Argagaxisada ee la Xiriira Falalaka Maaliyadda

Financial Institutions Hotline

1-866-556-3974

Nidaamyada Lagaga Hortagaya Falalka Dambiyeedka ee  
La Xiriira Maaliyadda  
MareykankaMareykanka Qaybta Hantidhowrka  
Washington D.C.

*Daabacaadda ee Nidaamyada Lagaga Hortagaya Falalka Dambiyeed ee la  
Xiriira Maaliyadda (FinCEN)*